# FOREX SOMALI

## Wax walba oo aad uga baahantahay suuqa sarifka lacagaha qalaad

**Abdiwali A. Ali**

**(Moalimuu)**

# Tusmada Buugga

DIGNIIN .......... 5

Horudhac .......... 7

Taariikhda Lacagta .......... 12

Sarifka lacagaha ee Online-ka ah .......... 24

Sariflayaasha suuqa .......... 25

Bangiyada khaaska loo leeyahay .......... 25

Bangiyada Dhexe ee Dawladaha .......... 26

Ganacsato iyo sharikaad .......... 27

Hanti maamulayaal iyo Maalqabeeno .......... 28

Shacabka intiisa kale .......... 30

Dulaalka suuqa (Broker) .......... 31

Taxliilinta Suuqa .......... 37

Taxliilinta Aasaasiga ah ee suuqa .......... 38

Taxliilinta Farsamo ee suuqa .......... 42

Shumacyada suuqa (Canldesticks) .......... 45

Isbedelka qiimaha (pips) .......... 46

Lacagt aad dhiganaysid (Lot size) .......... 47

Sagxad iyo Saqaf (Support and resistance) .......... 48

Jiheeyaha Suuqa (Trendline) .......... 49

Suuq Jiheysan (Trending market) .......... 50

Soo iibsasho iyo Iska iibin (Buy and Sell) .......... 51

Barta laga galo (Entry point) .......... 52

Khasaaro iyo faaido lagu talogalay .................................. 53
(Stop loss and take Profit)............................................... 53
Sida Loo fuliyo Sarifka ....................................................... 54
Luuqadda suuqa.............................................................. 59
Sidee u samaysmaa Shumac suuqu ................................. 61
Shumac aan lagu kala adkayn .......................................... 64
(Doji Candlesticks)........................................................... 64
Shumacyada Isliqa (Engulfing Candles)............................. 67
Xiddig subxeed (Morning Star) ........................................ 68
Xiddig qorax dhaca (The evening star).............................. 69
Dubbe/Burus (The Hammer) ........................................... 70
Xiddigga duula (The shooting star) .................................. 71
Shumacyada is-dhalay (The Harami pattern) .................... 72
Shumacyada Tartamada (The Tweezers)........................... 73
Iskulaab IstaraatiiJi............................................................ 75
Soo Furo Xariiqaha taagan ............................................... 76
Labada xariiqood sawiro .................................................. 77
Iskulaabka ilaasho ........................................................... 78
Xaqiijimo kale oo dheeriya............................................... 79
Bidix fiiri .......................................................................... 83
Xakamaynta khasaarada .................................................... 84
Lacagta aad ku bilaabaysid .............................................. 85
Khasaaro tafaariiqeed...................................................... 88
Intee Sarif ayaad isku furi kartaa ..................................... 90

Khasaaro intee leeg ayaa caadi ah .................................... 91
Waa maxay Sababtaadu? ..................................................... 92
Qorshe Ganacsi ........................................................... 93

# DIGNIIN

Macluumaadka Buuggani uu kulansaday ujeedkoodu waa in aan ku baro, kaagana warbixiyo xaqiiqada suuqa lacageed ee Dunida ugu weyn ee lagu kala sarifto lacagaha qalaad. Buugga qorshihiisu maaha in uu adiga ku siiyo Talooyin ku saabsan maalgashi ama sidii aad lacagtaada u maamuli lahayd, balse ujeedku waa in aad heshid warbixin iyo aqoon kugu filan si ay kuu anfacdo haddii aad goaansatid in aad ka qayb noqotid suuqaan, lacagtaadana aad ku maalgashatid.

Ka hor inta aadan ku dhaqaaqin macluumadka buugga ku xusan isku day in aad talo iyo hagid ka dalbatid qof kaaga xeel dheer maalgashiga iyo macluumaadka ku saabsan sida lacagtaada loo maamulo. Sida ay u fududahay in suuqaan lacag laga sameeyo si lamid ah ayay u fududahay in sidoo kalena lacag badan lagu khasaaro, waa haddii aadan ka fiirsan lacagaha aad lasoo galaysid. Ma jirto qof ka masuul ah khasaarahaaga oo aan adiga ahayn.

Ka shaqaynta suuqa Sarifku waa fursad wadata caqabadeheeda iyo Masuuliyadaheeda, waana sababta ay lagama maarmaan u tahay in aad aqoon ahaan u diyaar garowdid ka hor int aaadan wax talaabo ah qaadin. Suuqaan waxaa iyaguna

dhankooda kaga jira dad malaayiin lacag ah haysta, dawlado iyo Bangiyo sidoo kale balaayiin lacag ah lasoo shirtagaya, Aniga iyo Adigu waxaynu ka nahay kooxda ugu yar ee suuqaan qaybta ka ah, sidoo kale waxaynu nahay kooxda ugu horeysa ee khasaari karta haddii suuqa jihadiisu xumaato.

Faaidadii horay aad suuqa uga samaysay kuuma balanqaadayso faaidada aad mustaqbalka suuqa ka samayn kartid. Maalin walba waji gooni ah ayuu suuqu ku tusi doonaa, iska ilaali in adiga oo ka fakaraya faaiidooyinkii aad shalay aad samaysay in aad ku dag dagtid go'aamo aad isleedahay mar kale ayaad sidii oo kale samayn karta, si kasta oo aad xirfad u leedahay suuqaan maalin walba wuxuu kaa doonayaa barasho iyo macluumaad raadin maalintaa u gaar ah.

# Horudhac

Suuqa sarifka lacagaha qalaad waa xirfad calami ah oo ay maalin walba Bangiyada iyo maalgashadayaasha shirkadaha leh iyo kuwa shacabka ahiba ay isku bedelaan Lacagaha kala duwan ee dalalku ay leeyihiin. Waxa ay iska iibiyaan lacagaha markaas qiimahoodu sareeyo balse laga yaabo in uu hoos u dhaco, sidoo kalena waxay soo iibsadaan lacagaha qiimahoodu uu markaas hooseeyo balse la rajaynayo in uu kor u kaco si ay hadhoow usii iibiyaan marka lacagtii qiimaha yar lagu soo iibsaday ay suuqa ka yeelato qiima ka sareeya kii ay kusoo iibsadeen. Deetana kala bedelkaas lacageed ayay khidmad ka faaidaan.

Suuqa sarifka lacagaha Qalaadi waa fursad 24ka saac ee maalin iyo habeen furan, shanta maalmood ee shaqada. Dhaqdhaqaaqa ugu horeeya ee suuqu waxa uu soo bilowdaa saq dhexe Habeenka Isniintu soo galayso waxa uuna xirmaa fiid hore habeenka jimcuhu sii baxayo Sabtiduna soo galayso. Sariflayasha suuqaan ka shaqaysta oo idil waxa ay ku shaqeeyaan hab Online ah, Si uu qofku suuqaan qayb uga noqdo wuxuu u baahanayahay, kambiyuutar, moobil iyo Internet. Hawshaan oo idil waxa ay ka dhex socoto waa Shabakada Internetka, ma jiraan dad si toos ah inta u kulmaan

lacagaha kala beddelaya, ha yeeshee Maalgashiga iyo maamulida lacagtaada kuli waxa ay ka dhex dhacayaan waa Internetka dhexdiisa.


Berigii hore suuqaan sarifka keliya waxaa ka shaqaysan karay, Dawladaha iyo Bangiyada, hase ahaatee kadib markii Internetka iyo kambiyuutaradu ay soo baxeen Ayaan fursad u helnay in dadka caadiga ah ay sidoo kale suuqaan qayb ka noqdaan. Tiknoolajiyada iyo internetku waxa ay Dulaalka suuqa ee loo yaqaan Broker uu u fududeeyeen in shacabka aniga iyo adiga oo kale ah aan suuqaan ka dhex shaqaysan karno inaga oo Brokerka sii dhex marayna. Dulaalku waxa uu si jumlo ah u soo iibsaday lacagihii layku beddeli lahaa, deedna waxa uu inoo ogolaaday in aan isaga dhexdiisa si tafaariiq ah uga sii kala gadano, inaga oo Brokerka koonto ka furanayna. (Dulaalka iyo sida uu u shaqeeyo iyo wax walba oo ku saabsan gadaal ayaad ka akhrin doontaa)

Suuqaan sarifka lacagaha qalaad waa meel maalin walba lagu kala wareejiyo lacag ka badan Shan Tiriliyan oo Doolar. Sidaa daraadeed suuqaani waa qayb muhiim ah oo kamid ah dhaqaalaha dalalka lacagahoodu qiimaha ugu sareeya joogaanaxaa maalin kasta socda dagaal dhaqaale oo u dhexeeya dalalkaas, si uu dal walba u ilaashado in qiimaha

lacagtooda aysan hoos u dhicin, taasi oo keenaysa in ay si joogto ah ugu lug lahaadaan suuqaan sarifka lacagaha maalin walba.

In aad lacag dal leeyahay aad ku beddeshid dal kale lacagtiis waxay ku xirantahay labadaas dal dhaqaalahooda iyo heerarka ay maalintaas kala joogaan. Marka aad dal dhaqaalihiisu hooseeyo aad lacagtiisa soo iibsanaysid, waa in aad haysatid warbixin kugu filan oo kuu sheegaysa in dalkaas lacagtiisu ay qiima ahaan siyaadi doonto, dhanka kale haddii aad dal lacagtiis iska iibinaysid waa in aad ogtahay warbixin kugu filan in dalkaas lacagtiisu qiima dhacayo, adiga oo weli haysatana aysan kugu sii qiima dhicin.

Lacagaha ugu badan ee suuqaan maalintii lagu kala beddelo waxaa ugu weyn Lacagta dalka Maraykanka ee US Dollar. Waxaa kale oo soo raaca ilaa toddoba lacagood ee dalalka kala ah 2. EURO (Eur) 3. Japan (JPY) 4. Great Britain (GBP) 5. Switzerland (CHF) 6. Australia (AUD) 7. Canada (CAD) 8. New Zealand (NZD) iyaguna saamaynta ugu weyn suuqaan ku leh, dagaalka ugu weyn Siddeedaas lacagood ayuu maalin walba dhex mara.




Marka aad noqotid Sarifle suuqaan ka dhex shaqeeya waxa aad kala iibinaysaa isbedelka qiimayaasha laba kamid ah lacagaha aan kor kusoo xusay. Halkii kala beddel waa in uu dhexeeya laba lacagood si aad u fahamtid macnaha saxda ah ee halkaan ku jira bal aynu soo qaadano tusaale ahaan kasoo qaad in aad kasoo safartay dalka Maraykanka adiga oo Wata lacagta Doolarka dalkaas laga

isticmaalo, deedna aad booqasho ku timid dalka Ingiriiska, deetana aad lacagtii doolarka ahayd ku beddeshay lacagta Giniga Istarliinka ee dalkaas laga isticmaalo,  markaas aad is beddelka samaysanysay waxaa laga yaabaa in halkii doolar uu u dhigmayay 1.5 lacagta ingiriiska ah, haddii aad 100 doolar sarifatid waxaad haysataa 150 giniga istarliinka ah.

Mudo yar kadib adiga oo aan lacagtii isticmaalin ayaad isla Maraykan dib ugu soo laabatay deedna waxaad ku khasbanaatay in aad lacagtii dib doolar ahaan ugu beddelatid, hase ahaatee intii aad soo socotay waxaa isbeddelay qiimihii sarifka lacagta deedna waxaa suurtagal ah in halkii dollar uu markaan u dhigmo 1.6 giniga istarliinka ah. 150 gini ee aad wadatay marka aad dib u sarifto meeshii aad 100 doolar heli lahayd waxaad helaysaa 110 doolar.

Suuqa sarifka ee Online-ka ah waa sheeko soo shabahda tusaalaha aan kor ku xusay, waxa aad

kala gadaysid waa laba lacagood oo laba dal leeyihiin adiga oo aan midna booqan labadaas dal, balse isticmaalaya kambiyuutarkaaga, Moobilkaaga iyo Khadka Internetka. Waxaa jira dulaal dhexdhexaad idiin ah adiga iyo suuqa oo loo yaqaan Broker. Lacagaha aad kala wareejinaysid oo dhanna waxa ay ku dhex jiraan Brokerka gudihiisa, keliya koonto ayaad ka dhex furanaysaa deedna adiga oo gurigaaga dhex jooga ayaad kala gadaysaa lacagaha dalalkaasi leeyihiin adiga oo aan midna booqan, ama aan lacagtooda gacanta ku qaban.

## Taariikhda Lacagta

Inta aynaan ka hadlin sarif lacageed iyo ka shaqaynteed waxaa lagama maarmaan ah in aan fahamno sida ay ku timid lacagtaan laysku beddelayo. Suuqaan sarifka ee casriga ah waxa uu salka ku hayaa oo uu kasoo farcamay aragti guun ah oo isaga wax badan ka horeysay, dadku in ay lacagaha iyo wixii qiima leh ay isku beddeshaan waxa ay kasoo bilaabmatay casrigii Baabiliyiinta,Roomaanka, Giriiga iyo Masaarida.

Taariikhyahanadu waxa ay xusayaan in boqortooyooyinkaasi ay lacag ahaan u isticmaali jireen shilimaad ka samaysnaa Dahab iyo Qalin. Musaafiriin baayacmushtar ah ayay dhexdooda isku soo gali jireen iyada oo koox walba ay soo rartaan lacagtii dhulkooda laga isticmaalayay deedna marka ay dhul kale oo aan koodii ahayn yimaadaan lacagtoodii ayay ku beddelan jireen lacagta dhulkaas laga isticmaalo si ay ugu adeegtaan deedna ay dhulkoodii ugu laabtaan.

Boqolaal sano haddii ay dadku sidaas wax u kala wareegsan jireen markii dambe waxaa mushkilad noqotay in la xamaalo culayska shilimaadkii dahabka iyo qalinka ahaa, deedna waxay bilaabeen in halkii dahabka lasoo qaadi lahaa uu qofku soo qaato warqad shahaado ah oo dawlad ama boqortooyo dhulkaas ka jirtay ay soo saxiixday, warqadaas oo cadaynaysa in dahab tiro intaas ah le'eg uu meel heblaayo yaal warqadaanina ay cadaynayso deedna qofkii uu wax ka iibsanayay uu warqadii shahaadada ahayd ku wareejiyo kadibna uu qofkaasi dahabkii isagu la doonto isagoo warqadaas isitcmaalaya.

Warqadaas shahaadada ah ee dahabka dammiinka ka ahayd ayay ka timi lacagta warqada ah ee aynu manta isticmaalno. Taariikhyahanadu way isku

khilaafsanyihiin halkii ay marka u horeysay ka bilaabatay in warqad yar oo jeebka la galin karo aan lacag ahaan u isticmaali karno, balse waxay isku raacsanyihiin lacagta warqadda ah in ay ku timi in ay dammiin ka tahay dahab culus oo aan lasoo qaadi karin safarna lala gali karin, deedna halkii qofka musaafurka ahaa uu dahab lasoo safri lahaa ayuu warqadaas lasoo safrayaa, deedna uu qofka uu wax ka gadanayo uu warqadaas siinayo, kadibna qofkii uu warqadaas isna hadhoow Dahab ku beddelanayo.

Bilowgii qarnigii 20aad ka hor inta uusan bilaaban dagaalkii koowad ee aduunku ayay dawladihii iyo maamuladii dunideena casriga ah ka jiray oo idil waxay bilaabeen in ay lacago waraaq ah dhammaantood daabacdaan, deedna warqadaas qiimaheeda uu dammiin ka ahaado inta ay dahab ahaan u dhigmi karto, aragtida noocaas ahna waxaa loo bixiyay aragtidii Hal-beegga dahabka. Intaas kadibna baayacmushtarkii iyo dadkii ganacsatada ahaa marka ay dalal kale wax kasoo iibsanayaan waa in lacagtii dalkooda ay kala yimaadeen ku beddelaan lacagta dalkaas ay wax ka gadanayaa si ay badeecooyin iyo adeegyo uga iibsadaan dalkaas gudihiisa.

Sidoo kale isla waqtiyadaas ayay bilaabeen inta badan Bangiyadii caalamiga ahaa ee jiray in ay ogolaadaan aragtida Hal-beega Dahabka oo ahayd in lacagaha dalalku ay samaysteen oo idil dahab lagu beddelan karo, lacag walbana qiimaheeda lagu jaangooyn doono inta ay dahab ahaan u dhiganto.

Sanado badan ayay dunidu sidaas kusoo jirtay, hase ahaatee dalalka oo ku kala duwanaa kaydka dahab ee ay haystaan ayaa waxa ay keentay kala fogaansho dhaqaale iyo sicir barar lacageed oo soo laalaabtay markaas kadib ayaa la hindisay nidaamkii la magac baxay Nidaamkii Bretton wood.

Nidaamkaan Bretton wood waxa uu ka dhashay shir ay dhammaadkii dagaalkii labaad ee adnuuka kadib ay iskugu yimaadeen dalal ay ka mid ahaayeen USA, Canada, Australia, Japan iyo inta badan dalalka ku yaal Galbeedka Europe. Shirkaan oo qabsoomay July 1944kii ayaa waxa uu ka dhacay magaalo yar oo la yiraahdo Bretton Woods oo ku taal Gobolka New Hampshire ee dalka USA. Qorshaha shirkaani waxa uu ahaa kadib dagaal dunida oo idil saameeyay in la fariisiyo Nidaamka Dhaqaalaha aduunka ee Caalamiga ah dawladaha oo idilna ay sidaas dani ugu jirtay .

Dawladaha kasoo qayb galay shirkaan ayaa hadafkoodu ahaa in ay isku raacaan waajibaadyo dhammaantood ka saaran ka hortagga dhaqaale burbur dambe oo yimaada.

Shirkaan oo 22 maalmood socday ayaa lagu gaaray go'aamo waaweyn oo dhaqaalihii aduunka dhanka kale u jeediyay.

Nuxurkii ugu weynaa ee shirkaan ka dhashay wuxuu ahaa nidaamka Bretton wood oo lagu beddelay nidaamkii ka horeeyay ee Hal-beegga dahabka. Nidaamka Bretton woods waxa uu ahaa in lacagta Doolarka Maraykanka keliya ay ahaato lacagta lagu qiimaynayo inta ay Dahab ahaan uga dhiganto, halka lacagaha kale ee aduunka oo idilna lagu qiimeynayo inta ay Doolar uga dhigmaan. Go'aankaan waxaa sabab u ahaa in Maraykanku uu haystay kaydka dahabka ee aduunka ugu badan dalalka kale ee dunida oo idilna aysan haysan dahab ku filan oo lacagahooda lagu qiimeeyo, deedna halkaas lagu alifay in dal walba lacagtiisa uu ku qiimeeyo inta ay Doolar uga dhiganto deedna doolarkaas hadhoow lagu qiimeeyo inta uu dahab uga dhigmo.

Sidoo kale Natiijooyinkii shirkaan kasoo baxay waxaa kamid ahaa samayntii Laba Hay'adood oo

muhiim u ahaa horumarinta dhaqaalaha caalamiga ah ee casrigeena. Hay'adahaan ayaa loo sameeyay si looga kabsado Haddii dal ay soo wajahdo dhaqaale burbur iyo sicir barar iyadoo aan lacagta dalkaas qiimaheedu uusan dhulka galin.

Hay'adda koowaad ee Shirkaan lagu sameeyay waxay ahayd Hay'adda lacagta aduunka ee loosoo gaabiyo IMF (International monitory fund) Ujeedka loo sameeyay IMF ayaa ahaa in ay lacag ammaahiso dalalka dhaqaale xumidu soo wajahdo si uusan dalkaasi u daabicin lacag badan oo keeni karta sicir barar iyo dhaqaalahooda oo sii xumaada. Sidoo kale IMF qorshayaasha loo abuuray waxaa kamid ahaa in ay fududeeyaan ganacsiga xuduudaha ka gudbaya ee ay dalalku dhexdooda adeegyo iyo badeecooyin kal wareegsanayeen.

Hay'adda labaad ee shirkaan lagu sameeyayna waxay ahayd Bangiga Aduunka ee imminka loo yaqaan World Bank oo hadafka laga lahaa isagana uu ahaa in uu dalalka soo koraya ka caawiyo sidii ay ku hormarin lahaayeen dhaqaalahooda.

Nidaamkii Bretton woods waxa uu shaqaynayay ilaa sanadkii 1971dii markaas oo dawladda Maraykanku ay joojisay in ay lacagta doolarka ah dammiin uga dhigto dahab, maadaama kaydkii

dahabka ahaa ee ay haysteen uu sii yaraaday. Madaxweynihii Marykanka ee waqtigaas Richard Nixon aya ku dhawaaqay in Maraykanku uu ka baxay Heshiiskii Bretton woods kadibna ay halkaas ka bilaabatay nidaamka maanta jira ee Lacagta qiimaheedu Heehaabayo.

Nidaamka lacagta qiimaheedu Heehaabayo waa nidaam macnihiisa lagu soo koobi karo in dal walba uu lacagtiisa isagu masuul ka yahay, mana jirto dahab ama wax kale oo lacagtaas qiimaheeda dammiin ka ah. Dadku waxay ku khasbanaadeen in ay dawladahooda aaminaan lacagta uu bangiga dhexe ee dalkoodu daabacana ay lacag ahaan u aaminaan iyaga oo aan dahab iyo wax kale toona aysan dammiin ka ahayn.

Oraahda ah Nimaadka lacagta qiimaheedu Heehaabayo waxaa loola jeedaa lacagtaani maleh Qiima cayiman oo aan isbeddeli karin ee qiimaheedu waa mid hawada Iska Heehaabaya, marna kor u kacaya marna hoos u dhacaya iyada oo ay ku xirantahay dalabka lacagtaas ay dunida inteeda kale ka haysato iyo In laheli karo lacagtaas mark loo baahdo.

Mar walba oo Lacag cayiman baahideedu badato qiimaheeda ayaa qaali noqda, dhanka kalena marka

ay lacagtaasi noqoto mid mar walba la heli karo oo meel walba iska taal qiimaheeda ayaa hoos u dhaca. Arintaan ayaa keentay suuqa in sarifka lacagaha qalaad uu xamaasad cusub yeesho.

Maadaama ay lacagaha qiimahoodii uu noqday mid hawada iska heehaabaya waxa ay fursad u noqotay in Sariflayaashu ay si hoose ula socdaan dhaqaalaha dalalka ay lacagahooda rabaan in ay isku sarifaan, deedan lacag dal leeyahay ay sii odorosi karaan in qiimaheedu  hoos u dhacayo ama uu kor u kacayo. Haddii ay arkaan dal lacagtiisu qiima beelayso waxay samaynayaan in ay lacagtaas iska iibiyaan dhanka kalena marka ay arkaan lacag qiimaheedu kacayo ay soo iibsadaan.

Waqtiga aan buuggaan qorayo weli lacagta warqada ah ayaa dunida ugu awood badan, way jirtaa dabcan in Kaararka bangiyadu bixiyaan ay yareeyeen in lacag badan oo kaash ah ay dadku gacmaha ku qaataaan, ha yeeshee beddelkeedii qof walba waxa uu koonto ku samaystay bangiga dhexdiisa deedna waxa uu jeebka ku sitaa Kaar yar oo bangigaasi bixiyay oo ay ugu jiraan tirooyin u matalaya lacagta uu koontadiisa bangiga ku haysto isla markaana uu kaarkaas meel walba kaga adeegan karo.

Inkastoo lacagtii warqadda ahayd oo tirooyin iyo kaarar loo beddelay ay jirto welina ay awood leedahay balse waxaa dhaw waqtigii ay tiknooljiyada casriga ah ay meesha ka saari lahayd gabi ahaanba lacagtaas warqadda ah ee ay dawalduhu daabacaan bedelkeedana ay gali doonto lacag Digital ah oo Kambiyuutar iyo tiknoolajiyad lagu sameeyay dawlad iyo bangi toona uusan daabacin.

Lacagahaan Casriga ah ee loo yaqaan Kiribto kaaransi (Crypto currency) waxa ay soo ifbaxday sanadkii 2009kii markaas oo ay dunida horumartay la tacaalaysay dhaqaale burburkii ugu xumaa ee waqtigeena casriga ah ay dunidu aragtay. Lacagtii ugu horeysay ee noocaan ah ee soo baxda magaceeda waxaa la yiraahdaa Bitcoin taasi oo markii ugu horeysay si furan dunida loogu sii daayay sanadkii 2009kii. Hase ahaatee 10kii sano ee ka dambaysay waxaa la sameeyay ku dhawaad 4 kun oo kale lacago kiriibro kaaransi ah.

Lacagta digitalka ah waxa ugu weyn ay uga duwantahay lacagtii warqadda ahayd ayaa ah in aysan cidina maamulin halka lacagta warqadda ah ay dawladad iyo bangigu ay daabacayeen, maamulayeena.

Lacagtaan kiriibto kaaransiga ah waxaa lagu sameeya barnaamij kambiyuutareed loo yaqaan Cryptography waxaana fududeeyay in lacagtaan la samayn karo Tiknoolaji casri ah oo magaceeda loo yaqaan Blockchain.

Blockchain waa udub dhexaadka sababta u ah in kacdoonkaan lacageed uu bilowdo, waxa uuna meesha ka saaray gacantii saddexaad ee ku dhex jirtay mar kasta oo laba qof ay lacag is waydaarsanayaan. Tusaale ahaan haddii aan adiga hadda lacag kuusoo diro waxaa khasab ah lacagtaas aan kuu soo diray ay gacan saddexaad ogtahay, gacantaa saddexaad oo ah bangiga aan isticmaalayo oo hadhoow laga heli karo kala xogtii kala wareejiska dhaqdhaqaaqaas lacageed. Hase ahaatee marka aan aniga iyo adiga isku dirno lacag Digital ah sida Bitcoin ama kuwa kale ee lamidka ah, xogtaas waxaa kaydinaya Blockchain oo ah tiknoolaji dadka oo dhan ka dhaxaysa dawlada ama bangi toona uusan wax ka beddeli karin xogtii uu qabtayna aan laga beddelin karin sidii ay ahayd. Xasuusnoow sababta ugu weyn ee gacanta saddexaad keenaysa ayaa ahayd in aysan labadaan qof is aammini karin oo gacanta saddexaad ay ahaan lahayd meeshii hadhoow kala saari lahayd

haddii khilaaf yimaado, hase ahaatee markaan xog walba waxay ku jirtaa blockchain.

Dawladaha iyo Bangiyadu waxay sanado badan iyagu maamulayeen oo sidii ay doonaan ka yeelayeen lacagta iyo qiimaheeda balse sida hadda aduunku ku socdo waxay u muuqataa in markii u horeysay ay shacab, dawlad iyo bangi ay u sinaan doonaan lacagta iyo isbeddelka qiimaheedaba. Waxaase xusid mudan sida lacagta aan kor kusoo xusnay ee qiimaheedu heehaabo si lamid ah in ay lacagtaan digitalka ah iyadana uu qiimaheedu hawada heehaabo.

2014kii ayaa markii ugu horeysay aduunku bilaabeen in ay Bitcoin u aqbalaan lacag wax lagu iibsan karo, intii ka dambaysayna bil walba dalal cusub iyo shirkada cusub ayaa aqbalayay in Bitcoin ay tahay nidaam lacageed oo wax lagu kala beddelan karo. Ha yeeshee si lamid ah lacagta warqadaha ah ee dawladuhu daabacaan ayay lacagtaan Digitaalka ah Iyana qiimaheedu u dhexeeya mid kor iyo hoos u socda oo hawo dhexe heehaabaya.

Ujeedka aan taariikhdaan oo dhan usoo marnay ayaa ah in aan ku fahamsiiyo labada nooc ee lacageed ee aan kala sarifi karno iyo mid walba sida

ay ku timi iyo heerarkii ay soo martay, ilaa halkaan haddii aad soo gaartayna waxaad fahamsantahay in lacagaha maanta aduunka ka jira, mid warqad ah oo dawladdu daabacdo bangiyadana ku xaraysan iyo mid tirooyin kambiyuutareed lagu sameeyay oo tiknoolaji ku salaysan mid ay ahaataba waxaad ogaatay in lacagahaas wax lagu kala beddelan karo qiimaheeduna ay hawada heehaabayso, markii baahida loo qabo ay badato uu qiimaheedu kor u kacayo marka baahida loo qabo ay yaraatana uu qiimaheedu hoos u dhacayo.

Dadka ka shaqeeya suuqaan sarifka lacagaha qalaad waxa ay xirfad ahaan u barteen sida lacagahaas qiimahooda loola socdo, si mar walba oo lacagta qiimaheedu liito aad usoo iibsatid deedna hadhoow lacagtaas oo qiimaheedu sareeyo aad isaga sii iibisid.

Si aad u fahamtid Sarifka suuqa lacagaha qalaad iyo nidaamka uu u shaqeeyo waxaa lagama maarmaan ah in aad fahamtid nidaamka hadda looga shaqeeyo suuqaan sida uu ku yimi, Meesha uu kasoo bilowday, kooxaha ka shaqaysta iyo sidii aan aniga iyo adiga oo shacab ah aan suuqaan baaxadda intaa le’eg leh aan kamid noqoshadiisa fursad ugu helnay.

## Sarifka lacagaha Online-ka ah

Sida aan kor kusoo xusnay kadib markii aduunku usoo gudbay nidaamka lacagta qiimaheedu heehaabo ayaa waxaa bilowday in dawladaha sida ay u kala dhaqaale badanyihiin iyo sida bangiyadoodu u kala baaxad weynyihiin ay ugu kala tartamaan sidii ay saamayn ugu yeelan lahaayeen lacagta qiimaheedu uusan xadidneen ee saaka meeshii ay joogtay meel aad uga fog ay galabta gaari karto.

Intaa wixii ka dambeeyay waxa ay dunidu gashay dagaal dhaqaale oo ay Bangiyada waaweyni hogaanka u hayaan, waxaa bilaabatay in bangiyadu ay si ku talogal ah dal lacagtiis hoos ugu ridaan mid kalena kor ugu qaadaan iyaga oo doonaya in ay faaido ka dhex sameeyaan kala sarifka lacagtaas marka ay hoos u dhacayso iyo marka ay mid kale kor u kacayso. Bangiyadu waa halka ay ku kaydsantahay lacagta ugu badan ee dal walba gudihiis taal, shacabka lacagtoodii bangiga ayay taal taas ayaa u sahahashay in bangiyadu ay suuqa ugu kala saamayn weynaadaan sida ay ukala xajmi weynyihiin.

Waxaa soo baxay dad xirfadlayaal ah oo suuqa iyo sida looga shaqeeya bartay, kuwaas oo u shaqaynayay Bangiyada khaaska loo leeyahay,

Haya'adaha dhaqaale, bangiyada dawliga ah,shirkadaha iyo shakhsiyaadka hantida badan haysatay kuwaas oo bilaabay in ay maalgashi ku sameeyaan fursadaan dhaqaale ee aduunka kusoo biirtay, sidaas ayuuna ku bilowday suuqa sarifka lacagaha qalaad ee aynu maanta inagu qaybta ka nahay. Ha yeeshee waqtigaas uu bilowga ahaa shacabku qayb kama noqon Karin maadaama ay khasab ahayd in suuqaan uu keliya qayb ka noqon karo koox ama qof malaayiin doolar haysta.

## Sariflayaasha suuqa

### *Bangiyada khaaska loo leeyahay*

Suuqa sarifka lacagaha qalaad waa suuqa maaliyadeed ee dunida ugu weyn kaasi oo maalintii lakala wareejiyo lacag ka badan shan Tiriilyan oo doolar. Lacagaha intaas le'eg faaidada ugu badan iyo khasaaraha ugu badan waxay kala gaarta madaxya weynta suuqa oo ay hogaanku u hayaan Bangiyada noocyadooda kala duwan. Waxaa jira Bangiyo gaar loo leeyahay oo iyagu dhexdooda kala sarifta lacagaha kuwaas oo loo yaqaan bangiyada suuqa sameeya. Waxa ay haystaan kayd lacageed oo ay kusoo iibsan karaan lacag uu dal leeyahay isla markaasna ay isla lacagtaas iyagu sii iibinayaan si qiimaha asalka ah ay kusoo iibsadeen iyo qiimaha ay iskaga sii iibinayaan ay dhexdooda faaido uga

sameeyaan. Bangiyada noocaan ah waa kuwa aad ku aragtaan Filmaanta suuqaan iyo sarifkaba laga jilay, ee lagu tusayo iyada oo Boqolaal shaqaale ah oo hoolal waaweyn dhexdood maalin oo dhan taleefano ku hadlaya, waxay daqiiqad walba la socdaan isbeddelka qiimayaasha lacagta si ay isbeddelka suuqa uga dhex faaidaystaa.

### ***Bangiyada Dhexe ee Dawladaha***

Kooxda labaad ee suuqaan saamaynta ugu badan kuleh waa Bangiyada dhexe ee dawladuhu leeyihiin. Doorka uu bangiga dhexe suuqaan ku leeyahay waxa ay ku xirantahay dawladaas dhaqaale ahaan Meesha ay aduunka ka joogto iyo kaydka lacageed ee bangigooda dhexe ku kaydsan.

Doorka ugu muhiimsan ee bangiga dhexe uu suuqa ku leeyahay ayaa ah in uu bangigu yahay Meesha ay ku kaydsantahay lacagtaan qiimaheedu hawada heehaabayo ee ay sariflayaashu kala beddelayaan.

Bangiga dhexe waxa uu suuqa ku yeelan karaa saamayn muuqata maadaam uu awoodi karayo in uu suuqa lasoo galo lacagta kaydka ah ee gudihiisa taal haddii uu dareemo in qiimaha lacagta dalkooda hoos u dhac ba'an uu kusoo socdo, banigaga dhexe waxa uu samayn karaa in uu halmar kor usoo qaado isaga oo suuqa iyo sariflayaashaba saamayn

weyn ku yeelan kara. Hadafka ugu weyn ee ay suuqaan ugu jiraana waa in ay xasiliyaan isbeddelka ku imaan kara lacagta dalkooda maadaama qiimaheeda hawada heehaabaya si fudud ay sariflayaasha kale u saamayn karaan.

Sariflayaasha suuqaan ka shaqaysta waxa ay si hoose ula socdaan dhaq dhaqaaqa bangiga dhexe iyo warbixinada ay soo saaraan madaxda bangiga dhexe, sababtoo ah hadal uu madaxa bangiga dhexe yiraahdo keliya ayaa go'aamin karta dhaqdhaqaaqa ay samayn karaan sariflayaasha suuqa ku jira. Tusaale ahaan madaxda bangiga dhexe ayaa saxaafada ka hadli kara iyaga oo sheegaya in lacagta dalkaas hoos usii socota ayna damacasanyihiin in ay kor usoo kiciyaan hadalkaas dartiis ayaa waxaa dhici karta in waaxaha kale ee suuqa qaybta ka ah ay go'aamo degdeg ah qaataan iyadoo laga yaabo in hadalka bangiga dhexe uu ahaa mid siyaasadeysan oo uusan waxba sameeyeen.

### ***Ganacsato iyo sharikaad***

Suuqaan saacadii balaayiinta doolar lagula kala wareego waxaa sidoo kale qayb muhiim ah ka ah ganacsatada iyo sharikaadka hantida haysata. Kooxdaani iyagu waxa ay suuqa usoo galaan fursad ganacsi ahaan, waxa ay lasoo bareeraan hantidooda

khaaska ah iyaga oo fahamsan in ay faaido balaaran heli karaan sidoo kalena khasaaro ba'an ay la kulmi karaan. Inta badan waxa ay adeegsadaan shaqaale u tababaran xirfada akhrinta xaalada suuqa farsamo ahaan, waxa ay sidoo kale go'aamadooda ku saleeyaan in ay lasocdaan wararka iyo warbixinada kasoo baxa bangiyada khaaska ah iyo bangiyada dhexe ee dawladaha suuqa saamaynta badan ugu leh.

Sharikaadka waaweyn ee dhaqaalaha haysta waxa ay si joogto ah u maalgashtaan suuqa sarifka lacagaha qalaad, waxa ayna qayb libaax leh ka qaataan hadba suuqu dhanka uu u jiheysanayo, waxa ay shaqaalaysiiyaan xirfadleyda ugu haysta cilmiga suuqaan, waxay sidoo kale maalgashtaan tiknoolajiyado iyo barnaamijyo kambiyuutareed ka caawiya akhrinta suuqa iyo gaarista go'aamo ay ku faaidi karaan.

### ***Hanti maamulayaal iyo Maalqabeeno***

Sidoo kale waxaa suuqaan qayb weyn ka ah shakhsiyaad iyagu samaysta shirkado ay khaas u leeyihiin oo doonaya in ay dadka shakhsiyaadka ah ee hantida haysta in ay lacagtooda ugu shaqeeyaan, iyaga oo ku maalgalinaya suuqa sarifka lacagaha qalaad. Hanti maamulayaashu waxa ay suuqa lasoo galaan lacag aysan iyagu lahayn oo ay kasoo

uruuriyaan shacabka doonaya in ay faaido helaan balse aan suuqaan aqoon u lahayn, mar marka qaarna waxa ay lacago ugu shaqeeyaan dawladaha qaybtood iyo xataa bangiyada qaybtood.

Qof walba oo shacab ah iskama noqon karo kooxdaan, waxay u baahantahay in shuruudo dawladeed la buuxiyo, sidoo kale waxa ay u baahantahay in qofku uu ku dhaqmo shuruudaha u dagan hay'adaha sarifka iyo lacagaha dalkaas sharciyada u dajiya. Tusaale caan ah oo kooxdaan kamid ah waa nin oday ah oo la yiraahdo George Soros oo lagu naanayso ninkii jabiyay bangiga England.

George waxa uu lahaa shirkad ah kuwaas Hanti maamulayaasha ah oo kaga shaqayn jiray Suuqa sarifka lacagaha qalaad. Ninkaani waxa uu caan ku noqday qiso caan baxday oo uu sanadkii 1992dii uu hal maalin Sameeyay lacag gaaraysa Hal Bilyan oo doolar! kadib markii uu kala sarifay lacagta Giniga Istarliinka ee Ingiriiska iyo Lacagtii waqtigaas uu Jarmalku isticmaali jiray, kala wareejiska labadaas lacagoodna uu ka dhex sameeyay faaido gaaraysa Hal bilyan oo doolar.

### ***Shacabka intiisa kale***

Kooxda ugu tabarta yar ee suuqaan qaybta ka ah waa shacabka aniga iyo adiga oo kale ah oo aynu suuqaanba fursad u helnay kadib markii Internetka iyo tiknoonaljiiyadu ay fududeeyeen in ay soo baxaan dulaalliin internetka dhexdiisa ka shaqaysta oo noqday buundo isku xira shacabka jeeb yaraha ah iyo madaxweynta kale ee ka shaqyasata suuqa lacageed ee aduunka ugu weyn.

Dulaalka suuqaan inoo fududaynaya ee loo yaqaan brokerka isagu waxa ay tuubo ugu jirtaa kaydadka lacageed ee Bangiyada khaaska looleeyahay iyo bangiyada dhexe ee dawlahadaha, deedna waxa ay inoo sameeyeen Baro internetka dhexdiisa ah oo aynu moobilkeena ama kambiyuutar aynu ka gali karno halkaas oo ay inoo soo galiyeen lacagihii dalalka oo ay iyagu si jumlo ah usoo gateen deedna aynu inagu Bartaas dhexdeeda kusii kala gadgadayno iyaga oo tafaariiq ahaan inooga siinaya lacag ka badan tii ay jumlo ahaan ugu gateen si ay faaido uga dhex sameeyaan.

## Dulaalka suuqa (Broker)

Dulaalku waa waaxda saddexaad ee u dhexeysa suuqa sarifka iyo sariflayaasha sida shakhsiga ah uga shaqaysta iyaga oo aan bangi iyo shirkad toona ka tirsanayn. Dulaalku waxa uu shacabka aniga iyo adiga oo kale ah u abuuray madal ay ku kala beddeli karaan xaddiga qiimaha lacagaha kaasi oo daqiiqad walba isbeddelaya. Internentka ayaa fududeeyay in dulaalka noocaan ah ay isticmaali karaan shacabku iyaga oo guryahooda jooga, keliya waxa ay u baahanyihiin Kambiyuutar, moobil iyo internet.

Dulaalka waxa uu isagu haystaa qayb kamid ah lacagaha ugu waaweyn ee maalin walba laysku sarifo, marka uu qof shacab ah doonayo in uu laba lacagood isku sarifo waa in ay lammaane laba-laba ah isku raacaan. Marka aad lacagta doolarka maraynka ku sarifaysid lacagta yurub waxaad u akhrinaysaa lammaane ahaan adiga oo ugu yeeraya EURUSD, oo macanheedu yahay lacagta Euro oo lagu sarifay lacagta USD.

Lammaane walba oo laysku sarifayo lacag walba qiima cayiman ayay suuqa ka joogtaa daqiiqadaas aad kala wareejinta samaynaysid, waxa aadna rajaynaysaa in qiimahaasi uu kor ama hoos mid u bato, si aad isbeddelka suuqa wax uga faaidid.

Waxyaalaha uu suuqaani cajiibka ku yahay ayaa ah lacagaha aad isku beddelaysid labada dhinacba waad u raaci kartaa, tusaale ahaan Haddii aad EURUSD iska iibinaysid hoos ayaad u raacaysaa, haddiise aad soo iibsanysid kor ayaad usoo raacaysaa balse dhinaca aad u raacday maahee dhinaciisa kale haddii ay aado adiga ayaa khasaaraya, waana sababta ay muhiimka u tahay in aad xirfad u leedahay suuqa ka hor inta aadan lacag run ah lasoo galin.

Hadaba dulaalku isagu waxa uu haystaa lacagaha suuqa ugu dhaqdhaqaaqa badan oo lammaanayaal iskula socda, ha yeeshee qiimaha saxda ah ee ay lacag walba caadi dalkeeda uga joogto ayuu faaido yar dulsaaradaa si lamid ah sida dukaanlahu uu badeecada uu jumlo ugu soo qaatay uu faaido ugu raadiyo marka uu tafaariiq kusii gadayo. Deedna qofka shacabka ah ee lacagahaas doonaya in uu isku beddelo ayuu khidmad yar oo faaido ah ka dhex raadinayaa, khidmadaas ayaa waxaa luuqada ingiriisiga lagu yiraahdaa Spread.

Tusaale ahaan marka EURUSD qiimaheeda saxda ah ee layskugu beddelayo uu yahay 1.30010 balse dulaalka dhexdiisa ay ka joogto 1.30024, farqiga labadaas qiime u dhexeeya xisaab ahaan waxa uu noqonayaa 0.00024 oo noqonaysaa khidmadd

dhan 2.4pip. Pip waa kalmad ingiriis ah laga wado farqiga u dhexeeya inta ay lacagtu kor ama hoos u dhaqaaqday (Kor qiimaheeda ayaa batay, hoosna qiimaheeda ayaa hoos u dhacay) pip iyo spread waxa ay ka mid yihiin laba kalmadood oo aad in badan maqli doontaan inta aad suuqa ka dhex shaqayneysaan. Hayeeshee khidmadaas spreadka ah keliya dulaalku kaama faaidayo ee sidoo kale waxaa jirta lacag kiro ah ay qaybtood dadka ka qaadaan, lacagtaas ayaa Iyana ingriis ahaan loo yaqaan Commission oo macnaheedu yahay mar walba oo aad laba lacagood isku sariftid waxa uu kaa qaadi doonaa lacag commission ah oo uu kaaga kireynayo in aad dulaalkiisa dhexdiisa ku shaqaysanaysid.

Waxyaalaha kale ee aan dulaalka ku xulano waxaa kamid ah khidmada kabista ah ee afk ingiriisiga lagu yiraahdo Leverage. Khidmadaani maahan lacag dayn ama deeq ah ee uu dulaalku adiga toos kuu siinayo ee waa adeegga kuu sahlaya in aad ka shaqaysan kartid suuq ay ku jiraan kooxo balaayiin iyo maalyiin lacag ah haysta. Maahan lacag aad la bixi kartid ama haddii aad khasaartid uu dulaalku kaa gudanayo ee waa khidmad lacagtaadii yarayd ee aad suuqa lasoo gashay awood u siinaysa in ay ka

qayb qaadan karto sarifyada waaweyn ee suuqa laga fulinayo.

Dulaalladu way ku kala duwanyihiin habka ay dadka ula dhaqmaan, qayb ayaa keliya kaa qaadaya khidmada u dhexeysa lacagta qiimaheedii asalka ahayd iyo inta ay dulsaarteen oo ah spread-ka, halka ay dulaallada qaybtoodna keliya kaa qaadayaan lacagta kirada ah ee ku fuulaysa mar walba aad sarif lacageed samaysid ee loo yaqaan commission-ka, sidoo kale waxaa jira Dulaal labadaba kaa qaadaya.

Ha yeeshee waxaa jira nidaam saddexaad oo dulaalladu ay dadka lacag kaga qaadaan oo qofka muslimka ah xaaraam ku ah taasi oo ah in marka aad laba lacagood isku sariftid deedna adiga oo aan sarifkaas xirin uu habeen dhax galo waxaa jirta lacag ribo ah oo uu dulaalku ku saarsanayo, lacagtaas ayaa ingriisi ahaan loo yaqaan Swap. Ha yeeshee qof walba oo muslim ah wuu fahamsanyahay in uusan isticmaali Karin dulaal lacagta Swap-ka ah dadka ka qaada, marka hore ee aad dulaalka koonto ka furanaysid waxa ugu horeeya aad ka eegaysid ayaa ah in uusan swap lahayn.

Qofka shacabka ah way adagtahay in uu dullaal walba iska aamino ilaa in uu haysto sharciyad iyo shahaado caddaynasa in uu yahay dullaal rasmi ah oo dawlad iyo hay'ad dhaqaale ay waraaq cadayn ah siiyeen. Qodobkaan sida kii swap-ka oo kale waa muhiim in aad dullaal kasta iska eegtid halka uu sharciyad ka haysto ka hor inta aadan koonto ka furan. Isku day in aad internetka cilmi baaris kooban ka samaysid ka hor inta aadan dullaal furan, ka fiiri bartooda internetka waxa ay ku qorteen deedna fiiri baraha kale ee internetka dhexdiisa aad ka heli kartid waxyaalaha ay ka aaminsayihiin dullaalkaas si aad uga fiirsatid go'aankaaga.

Inta badan dullaal walba waxa uu leeyahay koonto tijaabo ah oo lacag aan run ahayn aad ka dhex furan kartid koontada caynkaan ah ayaa ingiriis waxaa lagu yiraahdaa Demo. Waa muhiim in aad koonto demo ah ka furatid dullaalka aad xiisaynaysid ka hor inta aadan lacag run ah ku bilaabin si aad u eegtid farqiga ay suuqa dhex gashtaan (Spread) iyo sidoo kale in ay sarif walba ku dul saartaan kiro badan ( Commission) iyo tan ugu muhiimsan oo ah in ay leeyihiin lacagta habeen dhaxa ladul saaro ee ribada ah (Swap)

Dullaalada suuqaan ka shaqeeya guud ahaan waxaa loo kala saari karaa dullaal isagu suuqa samaysta iyo dullaal aan suuqa waxba ka ogayn oo dhexdhexaad ka ah. Dadka shacabka ah ee aniga iyo adiga oo kale ah waxaa mar walba u fiican in ay ku shaqaystaan dullaal suuqa dhex dhexaad ka ah. Dullaalku isagu suuqa samaysta ayaa afka ingiriiska waxaa loogu yeeraa Dealing desk ama Market makers, khaladka ugu weyn ee ay macaamiishiisu ka cabanayaana waa in isla dullaalka dhexdiisa sarifka ku samaynaysid uu lacag aad hoos u raacday uu adigii kaa hor yimaado oo uu isaguna lacagtii kor usoo raaco, taasina waxay keeni kartaa in aad mar walba suuqii ku khasaartid dullaalkuna uu faaido.

Dullaalka suuqa dhexdhexaadka ka ahi waa kaas lidkiisa oo marka aad sarif gashid fulintaadu toos ayay u furmaysaa iyadoo uusan qof kale go'aan ka gaarin, faaido iyo khasaaro waxa ay ku dhammaan doontana dulaalku saamayn kuma yeelan karo, haddii akhrintaadii suuqa ay saxnayd sarifkaasina dhankii aad u filaysay uu aado dullaalku waxba kama beddeli karo. Dullaalka noocaan ah ayaa waxaa af ingiriiska lagu yiraahdaa Straight Through processing (STP) oo macnaheedu yahay in uu dulaalku uu sarifkaas toos suuqa u galinayo isaga

oo isticmaalaya nidaam loo yaqaan Electronic Communication Network (ECN) oo micanaheedu yahay shabakad xiriir oo hab elektaroonik ah iskugu xiran.

Brokerka ECN-ka ah waxa uu ku fiicanyahay marka aad sarif kor ama hoos mid u gashid waxa uu toos kugu xirayaa suuqa, ma jiri doono qof dullaalka ka shaqeeya oo meel fadhiya oo fariintaadu ay sii marayso si uu saamayn ugu yeesho, ha yeeshee adiga iyo malaayiin ruux oo dhanka aad u raacday suuqa u raacay ayaa wada faaidaya ama wada khasaaraya, natiijaduna waxay ku xirantahay in akhrintaadii iyo taxliilintaadii suuqa ee aad go'aanka ku qaadatay ay saxnayd.

## Taxliilinta Suuqa

Inta aadan waxba dullaal furan waa in aad taqaanid sida suuqa dhaqdhaqaaqiisa loo taxliiliyo, adiga oo isticmaalaya baraha internetka dhexdiisa ah ee shaxanada suuqa iyo shaxdiisa laga akhriyo. Marka aad qaadanaysid go'aan ah in aad laba lacagood isku sariftid waa in aad taqaanid lacagahaas waddamadii laga lahaa xaaladaha ay dhaqaale ahaan ku sugaynyihiin.

Dal walba dalka uu ka dhaqaale fiicanyahay lacagtiisu way ka awood weyntahay dalalka

dhaqaalahoodu hooseeyo, taxliilinta noocaan ah waxaa Ingriis ahaan loo yaqaan Fundemantal Analysis oo macanaheedu yahay taxliilinta aasaasiga ah ee suuqa, taasi oo aad kula soconaysid asaliyanba lacagtaan dalkii laga lahaa xaaladda uu ku jiro si aad uga digtoonaatid saamaynta ay ku yeelan karto qiimaha lacagta ee hawada heehaabaysa ee aad adigu sariflaha ka tahay.

Dhanka kale waxaa jirta taxliilin farsameed suuqa lagu sameeyo oo afka ingiriiska lagu yiraahdo Technical analysis, oo macanaheedu yahay in aad si muuqata ula socon kartid dhaq dhaqaaq walba oo lasoo dhaafay ee uu suuqu sameeyay, si aad usii ogaatid dhinaca uu suuqu u dhaqaaqi karo sababtoo ah suuqu wixii uu soo sameeyay ayuu mar walba dib u sameeyaa.

## Taxliilinta Aasaasiga ah ee suuqa

Taxliilinta aasaasiga ah ee suuqu waa qodob muhiim ah oo sarifle walba oo suuqa ka shaqaysta uu ku khasbanyahay in uu isha soo mariyo ka hor inta uusan wax talaabo ah qaadin sababtoo ah haddii aadan ogayn dalalkii lacagtaan lahaa dhacdooyina iyo warbixinada maalintaas kasoo bixi kara waxa ay kugu keeni kartaa in adiga oo sarifka dhexda kaga jira uu suuqu kula aado dhankii aad u


raacday maahee dhanka kale. Haddaba si aad iskaga ilaalisid khatar laga baaqsan karay waa lagama maarmaan in aad wararka iska sii hubisid, waa halkii ay soomaalidu ka oran jireen war la helyaaba talo la hele.

Waqtigaan casriga ah ee aynu noolnahay tiknoolajiyadu waxa ay inoo sahashay in aan wax walba oo dunida daafaheeda ka dhacaya aan la socon karno inaga oo aan guryaheena dhaafin. Waxaa jira baro internetka dhexdiisa ah oo la booqan karo iyo barnaamijyo badan oo moobilka lagu shubto kuwaas oo dhammaantood kusiinaya wararka iyo warbixinada la filayo in ay suuqa saameeyaan, keliya adiga shaqada kuu taal waa in aad baartid wararka soo baxay deedna aad fahamtid saamaynta dhaqaale ee ay dalkaas iyo lacagtiisaba ku yeelan karaan.

Dadka suuqaan ka shaqaysta meelaha ugu badan ee ay warakaan kala socdaa waxaa kamid ah Barta internetka ah ee magaceeda la yiraahdo Forexfacory.com ee aan sawirkeeda hoos bogga xiga aan idinkula wadaagayo. Bartaas waxaad kala socon kartaa wararka suuqa kasoo baxaya iyo waqtiyada ay soo baxayaan iyo saamaynta ay yeelan karaan inta ay le'egtahay.

Fariimaha barta ku jira waxay leeyihiin calaamado lagu kala garanayo wararka iyo saamayntooda.

Tusaale ahaan Warka saamaynta xooggan yeelan kara waxay ku calaamadeeyeen midab casaan ah, warka saamayn dhexdhexaad ah yeelan kara waaxay ku calaamadeeyen midab oranji ah, warka saamayn hooseysa yeelan karana waxay ku calaamadeeyeen midab jaale ah ugu dambayna wararka aan wax saamayn ah yeelanayn waxay ku calaamadeeyeen midab madoow khafiif ah.




Dhacdooyinka suuqa saamayn kara ee waraku kasoo baxaan waxaa kamid ah, koritaanka dhaqaale ee dalkaas ku siyaada oo keeni karta in lacagtoodu suuqa awood ka yeelato, dhanka kale waxay noqon kartaa warbixin ku saabsan sicir bararka oo

siyaaday iyo dhaqaale xumi dalkaas soo wajahday oo keeni karta in lacagta dalkaasi ay suuqa qiima hooseeyo ku yeelato.

Bangigaga dhexe ee dalkaas iyo warbixino ay madaxda bangiyadu soosaareen dhacdooyin kusoo siyaaday ayay waraku ku saabsanaan karaan, waxay kale oo ay ku saabsanaan karaan shacabka dalkaas intooda shaqaysa iyo inta shaqo la'aanta ah iyo mushahaaraadka soo gala qof walba iyo saamaynta ay dhaqaalaha dalkaas ku yeelan karto. Waxay ahaataba adiga shaqadaadu waa in aad ka hor inta aadan talaabo qaadin aad taqaanid sida wararka iyo dhacdooyinka aduunka loo taxliiliyo.

Si aad u akhrisid wararkaa ku dhufo bashqadaha dhacda walba horteeda ka muuqata deedna waxay kuu sheegaysaa xogtaas Meesha laga soo xigtay, xogtu waxa ay ku saabsantahay, saamanyta ay suuqu ku yeelan karto iyo sariflayaasha lacagtaas isha ku haya waxyaalaha la gudboon ee ay samayn karaan.

Badanaa waxaa fiican in aad war walba iska sii akhrisid ka hor inta aadan suuqa soo galin, si aad u sugtid in wararka waaweyn ay ku dhaafaan haddii kale adiga oo sarifkii kuu furanyahay oo aad EURUSD kor u raacday oo aad faaido ku jirtid

ayaa war kasoo baxay dartiis suuqii hoos kula aadi karaa, deedna waxaa imaanaysaa inaad sarifkaas ku khasaartid sidaa darteed waa muhiim in aad la socotid warka soo bixi kara in uu saamayn weyn yeelan karo ka hor inta aadan talaabo qaadin.


## Taxliilinta Farsamo ee suuqa

Taxliilinta farsamaysan ee suuqa sarifka lacagaha qalaad waa nidaam ay sariflayaashu ku qiyaasaan jihada uu suuqu aadi karo iyaga oo akhrinaya xogta kaydsan ee dhaqdhaqaaqii uu suuqu soo sameeyay.


Sariflayaashii berigii hore suuqa ka shaqayn jiray waxay isticmaali jireen sawir gacmeedyo ay iyagu sawiraan, balse waqtigeena casriga ah Internetka ayaa wax walba fududeeyay. Waxaan awoodi karnaa 20 sano lasoo dhaafay xogtii dhaqdhaqaaqa suuqa in aan helno keliya anaga oo isticmaalayna baraha suuqa laga akhriyo ee internetka dhexdiisa ah.

Sarifle walba oo suuqaan xirfad ahaan u bartay Meesha ugu badan ee uu waqtigiisa ku bixiyo waa akhrinta shaxanada suuqa ee xogtii lasoo dhaafay, si aad xirfadle suuqaan ku guulaysta u noqotid waa lagama maarmaan in aad adigana baratid sida loo akhriyo xogta kaydsan ee suuqa deedna go'aamadaada oo idil loogu saleeyo waxa aad arki

kartid. Tusaalaha ugu caansan aan soo qaadan karo waa barta internetka ah ee loo yaqaan Tradingview.com oo ah halka ugu caansan ee ay sariflayaasha xirfadaan bartay maalin walba booqdaan si ay suuqa farsamo ahaan ugu taxliiliyaan.




Tradingview.com waa madal aad si bilaash ah koonto uga dhex furan kartid adiga oo gashanaya xogtaada khaaska ah deedna aad samaysanaysid fure sireed aad keligaa kusoo gali kartid. Marka aad soo samaysatid ee aad gudaha usoo gudubtid waxa aad imaanaysaa boggaan sawirka kore ka muuqda deedna riix Meesha aan kuu calaamadeeyay ee ay ku qorantahay Charts si aad u timaadid boggii wax lagu taxliilin lahaa.





Boggaan kor ka muuqda waa Meesha uu sarifle walba oo suuqaan guul ka gaaraya uu maalin walba booqdo si uu ula socdo talaabo walba oo uu suuqu qaadayo deedna uu u go'aansado lacagaha maalintaas fursadu ka dhawdahay iyo waqtiyada la kala sarifi karo, kor iyo hoos meeshii loo raaci lahaa iyo ilaa intii lagu jiri lahaa sarif walba.

Waxaa jira 10 qodob oo halkaan marka aad maraysid ay tahay in aad kala taqaanid si ay kuugu fududaato taxliilinta farsamaysan ee suuqa. 10kaas qodob qayb kamid ah gadaal waan ka faah faahin doonaa balse iyaga oo kooban marka hore aan kusiiyo.

***Shumacyada suuqa (Canldesticks)***



Shumacyadu suuqu waa calaamad lagu kala garto lacag cayiman, waqti cayiman in ay kor u socoto oo sariflayaashu ay soo iibsanayaan ama in ay hoos u socotay oo ay sariflayashu iska iibinayaan. Mar walba oo dadka lacagtaas soo iibsanaya ay ka bataan kuwa iska iibinaya waxaa samaysmaya shumac kor u socda oo badanaa midabkiisa dadku ay cagaar ka dhigtaan. Dhanka kale mar kasta oo sariflayaasha lacagtaas iska iibinaya ay ka bataan kuwa soo iibsanaya waxaa samaymaya shumac hoos u socda oo badanaa ay dadku midabkiisa casaan ka dhigtaan.




Halkii shumac waqtiga uu soconayo adiga ayaa dooran kara, daiiqad, saacad iyo maalin intii aad doontid ayaad ka dhigan kartaa. Mar walba aad waqti dheer dooratid waa mar walba aad arki kartid dhaqdhaqaaq badan oo suu suuqu sameeyay waqtiyadii lasoo dhaafay.

### *Isbedelka qiimaha (pips)*




Pips waxaa laga wadaa isbeddelka qiimaha lacagta aad sarifaysid ku yimaada. Kor iyo hoos mid uu u dhacaba lacag walba qiimaheedu waa mid aan jaango'nayn oo hawada heehaabaya, daqiiqad walbana isbeddel ayaa ku imaan kara.

Wax badan ayaad maqli doontaa kalmadaan ah pips, sababtoo ah haddii aad suuq la iibsanayo aad kor u raacdid waxa la xisaabsanayo waa inta pip ee aad kor uga qabatay sarifkaas, haddii aad suuq la iska iibinayo aad hoo u raacdidna waxa aad xisaabsanaysid waa inta pip ee aad hoos uga qabatay sarifkaas.




Inta pip ee aad sarif walba ka qabatay waxaad ku xisaabsan kartaa calaamada mastarada ah ee aan sawirka koowaad ku xusay. Pipska aad qabatay waxaad kale oo ku garan kartaa farqiga u dhexeeya qiimaha sarifka lacagtaasi marayayay markii aad suuqa soo gashay iyo markii aad ka baxday, qiimaha lacagtana waxaad ka arki kartaa dhanka bidix ee shaashada.

### *Lacagt aad dhiganaysid (Lot size)*

Markasta oo aad sarif cusub galaysid waxaa lagama maarmaan ah in aad sii qiimeysid inta lacagtaada kamidka ah ee aad ogoshahay in aad halis galisid, maadaama aan 100% la ogayn sarifkaas aad gashay faaido keliya uu ku dhammaan karo.




Sida sawirkaan ka muuqata marka aad fulinaysid kala sarifikii lacag aad soo taxliilisay waa muhiim in aad dooratid lot size ay koontadaadu xamili karto.

### *Faaido iyo khasaro*

Sarif walba aad gashid faaido ama khasaaro midka uu ku dhammaanayo waxa ay ku xirantahay lot size-kii aad sarifkaas la gashay oo lagu dhuftay inta Pip ee uu suuqu dhaqaaqay.

Haddii ay koontadaada dulaalka ay kuugu jirto $100 deedna aad gashay hal sarif adiga oo isticmaalaya $0.5 lacagtaada kuu taal kamid ah, deedna uu suuqu 50 pip u dhaqaaqay dhankii aad u raacday, waxaad heleysaa $25 faaido ah, balse haddii suuqu uu kula aado dhankii aad u raacday maahee dhanka kale, markaas adiga ayaa $25 khasaaraya.

## *Sagxad iyo Saqaf (Support and resistance)*




xariiqda jiifta ee shamacyada suuqa muujiya marna kor ka xigaan marna hoos ka xigaaan ayaa la yiraahda Sagxad iyo Saqaf. Xariiqdaan iyo isticmaalkeedu waa mid kamid ah waxyaalaha ugu muhiimsan ee ay tahay in uu yaqaan qof walba oo suuqan xirfad ahaan u baranaya.

Xariiqda jiifta waxaa lagu cabirtaa dhinaca uu suuqu u socdo iyo midka awood badan sariflayaasha waqtigaas suuqa ku jira ee lammaane lacageed walba iibsanaya iyo kuwa soo iibsanaya.

Markasta oo aad xariiqda dhigatid halka ay ku dhammaadaan shumacyada cas cas ee muujinaya in suuqu hoos usoo socday halkaas sagxada u ahna uu dhaafi waayay waxaana loo yaqaan Sagxad (Support) Isla xariiqdaas jiifta ayaa Saqaf loo yaqaan markasta oo aad xariiqda dhigatid halka ay ku dhammaadaan shumacyda cagaarka ah ee muujinayay in suuqu uu kor u socday.

*Jiheeyaha Suuqa (Trendline)*




Xariiqda Jihada suuqa uu u socdo lagu cabirto ee sidaan gees geeska ah loo sawiro ayaa waxa Ingiriis lagu yiraahdaa Trendlines. Jiheeyaha suuqu waa xariiq ay sariflayaasha suuqu u isticmaalaan in ay kula socdaan jihada uu suuqu u socdo kor ama hoos iyadoo ay xariiqda afka u saarayaan meelaha uu suuqu ka laabtay.

Marka uu suuqu kor u socdo xariiqda jiheeyaha ah waa in ay shumacyadu suuqu ka sareeyaan oo mar walba ay kor u kacaan ee lasoo celiyo ay xariiqda ka laabtaan. Ha yeeshee marka uu suuqu hoos u socdo waa lidkeeda oo waa in shumacyada suuqu ay xariiqda hoos ka xigaan mar walba oo suuqii hoos u socday kor loosoo celiyaba waa in xariiqdu ay celisaa. In jihadi suuqu isbeddeshay waxaad ku garan kartaa marka xariiqdii suuqa celin lahayd lasoo jabsado oo suuqu dhinaca kale xariiqda ka maro.



***Suuq Jiheysan (Trending market)***

Suuqa dadka adkeeya ee wax aan la baran Karin kaaga dhigaya waxay ilowsanyihiin suuqaan keliya labba jiho midkood in uu aadi karo oo aysan jiho saddexaad jirin. mar walba oo suuqu uu jihada kore u socdo sug inta uu samaysanayo kor cusub oo ka saraysa korkii hore si aad u hubsatid in uu weli kor u socdo, balse marka aad arki waydid kor cusub waxaad garanaysaa in suuqa uu jihadii beddeshay.





Jihada Hoose marka uu suuqu u jeedo iyana waxaad ku garan kartaa in mar walba uu samaysto hoos cusub oo kasii hooseysa hoostii hore, marka aad waydid hoos cusub ee suuqu soo laabto waxaad ogaanaysaa in jihadii suuqa ay isbeddeshay. Way dhici karta mar mar suuqa uusan labada jiho midna u socon waana marka ay tahay in aad ka joogtid suuqa inta uu jiho toos ah u dhaqaaqayo.

***Soo iibsasho iyo Iska iibin (Buy and Sell)***

Suuqa sarifka lacagaha qalaad waxyaalaha uu la khaaska yahay waxaa kamid ah in lacag walba oo lakala sarifayo aad dhinaca doontid ka istaagi karid, halkaan ayay dadka qaybtood ku wareeraan balse haddii aad horudhaca buugga soo akhrisay waxaad garanaysaa in lammaane lacageed walba oo la is raaciyay aad soo iibsan kartid sidoo kalena iska iibin kartid. Marka uu suuqu kor u socdo fursad soo iibsasho ah ayaad raadinaysaa adiga oo faaidadaadu ku jirto inta pip ee aad kor u raacday. Sawirka sida ka muuqata ayaad dooran doontaa long position marka aad fursad kor u raacaysid.







Dhanka kale marka aad suuq hoos u socda aad fursad iska iibin ah ka heshid sida sawirka ka muuqata ayaad soo dooranysa Meesha y ku qorantahay Short position adiga oo ka faaidaysanaysa inta pip ee suuqaas uu hoos usii socon karo.

### ***Barta laga galo (Entry point)***

Marka aad farsamo ahaan suuqa taxliilinaysid ujeedka u dambeeya ee loo socdo waa in aad heshid fursad aad suuqa kor ama hoos mid ugu raacaysid ee mar walba oo aad aragtid shumac kor u socda kor u raaci maysid mid hoos u socdana hoos u raaci maysid.


Si aad suuqa guul uga gaartid waxaad u baahantahay tababar iyo qorshe faahfaahsan oo aad ku shaqo gashid, balse qodobkaan waxaan halkaan ugu soo daray in aan ku fahamsiiyo in aad qof ama koox aad la shaqaysan kartid adiga oo waydiinaya sarifyada ay ku jiraan bartii ay ka galeen si aad dhankaaga uga eegtid in weli uu suuqu marayo meeshii ay ka galeen ama in uu dhaafay.

Waxaad arki doontaa macalimiinta iyo ardayda oo kawada hadlaya fursado laysla wadaagayo, tirooyinka la isla waydiinayo waxaa kamid ah tiro laguu sheegayo in ay tahay bartii suuqa laga galay, haddii aad saacado kadib fariinta heshid isku day in aad Tradingview.com timaadid deedna aad fiirisid barta ay suuqa ka galeen in wax badan laga soo tagay ama in weli suuqa uu halkii marayo si aad go’aan saxan u qaadatid halkii aad fursad mar hore dhammaatay aad keligaa dhinac khaldan u raaci lahayd.

## ***Khasaaro iyo faaido lagu talogalay (Stop loss and take Profit)***

Taxliilinta suuqa ujeedka laga leeyahay waa in aad ugu dambaynta qaadan kartid go'aan ah in aad suuqa kor am hoos aad mid u raacdid adiga oo ku xisaabtamaya guul iyo guuldaro mid walba in aad la kulmi kartid.

Sida aan digniinta hore ee buugga kusoo xusay suuqa sarifka lacagaha qalaad waa xirfad u baahan barasho iyo tababar, sarif walba aad gashidna ma jirto hubanti kuu sheegaysa in uu ku dhammaan doono meeshii aad adigu filanaysay sidaa daraadeed waa lagama maarmaan in fursad walba inta aadan galin ka hor aad sii xisaabsatid haddii la khasaaro intee khasaaro le'eg ayaad ogoshahay, haddii la faaidana intee faaido le'eg ayaad u socotaa.





Marka aad fursad suuqa ka heshid deedna aad go'aan ku gaartid in aad fursadaas sariftid waxaad u baahantahay in aad soo qaadatid tirooyinka dhanka midig ee shaashada kaaga so muuqda deedna aad mobilkaaga timaadid si aad sarifkii u fulisid deedna aad natiijada u aragtid.

# Sida loo fuliyo Sarifka

Marka aad suuqa aasaasi ahaan iyo farsamo ahaanba aad u soo taxliilisid deedna aad ku qanacdid fursad la sarifi karo in ay jirto ayad imaanaysaa mobilkaaga deedna waxaad lasoo dagaysaa barnaamij la yiraahdo Metatrader4 oo aad ka dhex galaysid koontadii aad dullaalka ku lahayd si aad sarifkii moobilka dhexdiisa uga samaysid.




Haddii aad soo akhrisay cutubka aan kaga soo hadlay dullaalka iyo sida koontada looga furto waxaad soo fahamtay in marka uu dullaalku ku aqbalo ee aad cadaymahaaga u dirto kadib uu kusiin doono koonto kuu gaar ah oo aad suuqii kaga shaqaysan kartid, koontadaas ayaad galinaysaa App-kaan aad lasoo dagtay.





Sida sawirkaan labaad ka muuqata waxa uu ku siinayaa doorasho ah in aad furatid koonto tijaabo ah (Demo) ama in aad furatid koonto xaqiiq ah oo adiga kuu gaar ah. Labadaas doorasho midka aad dooratidba marka aad gudaha usoo gudubtid waxaad imaanaysaa halkii lagu shaqaynayay ee ay

ku jireen lacagaha dalalka qalaad oo lammaane laba-laba ah iskula socda, deedan waxaad ka dhex dooranaysaa lammaanihii aad soo taxliilisay si aad sarifka u fulisid. Marmarka qaar waxaa dhici karta in lammaanihii aad raadinaysay aad safka ka dhex waydid, markaas oo kale calaamda + ee xagga sare ku taal ayaad jiidaysaa si aad ugu soo darsatid lammaanaha lacageed ee aan safkaaga ku jirin.




Sida tusaalahaan ka muuqda waxaan soo doortay in aan isku sarifo labada lacagood ee EURUSD. Marka aan safka kasoo dhex doorto lammaanaha EURUSD kadib warqadaas sawirka ka muuqata ayaa iisoo baxaysa deedna si aan sarifka u fuliyo waxaan dooranaya Meesha u saraysa ee ay ku qorantahay New order oo macnaheedu yahay dalab cusub. Marka aad dalabka cusub dalbatid warqada ku xigta ee soo baxaysa ayaad kusii cadaynasaa nooca dalabkaaga oo faah faahsan.




Warqadaan xigta ee kuusoo baxda waxad ku cadaynasaa sarifkaan inta lacagtaada kamid ah ee dalabkaan aad la galaysid, faaidada aad u socotid iyo khasaaraha aad ogoshahay iyo kor ama hoos Meesha aad sarifkaan u raacaysid.

Inta badan marka ay fursado sidaan oo kale diyaar u tahay tirooyinka aad tradingview kusoo diyaarsatay ayaad galinaysaa deedna sida hoos ka muuqata ayaad iska-iibin(Sell) ama soo-iibsasho (Buy) midkii aad ku talogashay ku dhufanaysaa. Intaa kadib warqadaan ayaa kuu muuqanaysa oo cadaynasa in hal sarif uu kuu furanyahay adiga oo iska iibinaya lammaanaha lacageed ee EURUSD isla markaasna aad suuqa lasoo gashay lot size dhan 0.01 oo lacag ahaan u dhigmaysa $0.10 senti taas oo macnaheedu yahay halkii pip uu suuqu dhaqaaqo in aad faaidaysid ama khasaaraysid $0.10 senti oo lacagtaada kamid ah.



Fursadaha qaybtood waxaa imaan doonta in aad suuqa ku gashid dalab aan weli waqtigiisii la gaarin. Tusaale ahaan taxliilintaadu waxay u badantahay in suuqaan uu hoos aadi doono oo uu ku haboon yahay in la iska iibiyo (Sell) ha yeeshee weli ma uusan gaarin barta aad ka gali lahayd (Entry point) markaas oo kale sida sawirkaan ka muuqata waxaad dalabkaaga ka beddelaysaa Market execution oo macnaheedu yahay suuqu Meesha uu marayo iga gali, waxaadna ku beddelaysaa afarta dalab ee kale midka aad u socotid. Sell limit iyo buy limit waxaa laga wadaa suuq jihada uu u socdo maahee dhanka kale marka uu usoo jeesto meel cayiman aan calaamdsaday dalabka iiga fur. Sell stop iyo Buy stop Iyana waxaa laga wadaa suuqa isla jihadaas uu ku socdo haddii uu kusii socdo Meesha uu marayo meel kasii horeysa marka uu soo gaaro dalabka ii fur. Keliya xasuusnow dalabyada la balansado oo idil waxay kaa rabaan in aad Meesha ay Price ku qorantahay aad galidis tiradii lagu siiyay (Entry point)



Dalabkaagu marka uu furmo uma baahnid in aad suuqa maanta oo idil aad ilaalisid sababtoo ah waxa aad sii xisaabsatay natiijo walba oo imaan karta wixii aad khasaaro iyo faaido kaaga imaan lahaa. Sug oo u dulqaaqo in ay dalabyada oo idil ay la kulmaan mid kamid ah faaidadii aad filaysay ama khasaarihii aad ogolayd.

Marka hore inta aadan wax sarif ah galin si fiican uga fiirso go'aanka aad suuqa ku galaysid, sidoo kale ka fiirso dalab walba aad galaysid inta lacag aad isaga keliya ku khasaari kartid iyo guud ahaan dalabyada kuu furan inta aad kuligood ku khasaari kartid, kadib go'aan qaado adiga oo iswaydiinaya koontadayda lacagta iigu jirta maka go'daa oo ma xamili karaa in aan intaas oo dalab ku wada khasaaro?

Haddii marka hore aad sidaas u xisaabtantid way kuu fududaan doontaa in aad si daganaan ah u shaqaysato daqiiqad walbana aadan mobilka iyo kambiyuutarka dul fadhiyin. Dhib kuma jirto in aad mar ama laba ka war doontid dalabyadii kuu furnaa iyo Meesha xaalku marayo balse waxaa khalad ah in aad maanta dhan moobilka daawatid sidii in aad indhaha ku celin kartid Meesha ay wax u socdaan.

## Luuqadda suuqa

Xirfaddaan sarifka suuqa lacagaha qalaad waxay leedahay luuqad u khaas ah oo sariflayaasha ka shaqaysta ay ku khasbanyihiin in ay fahmaan si ay ula socdaan macnayaasha ku jira dhaqdhaqaaqyada joogtada ah ee uu suuqu daqiiqad walba kor iyo hoos u dhaqaaqayo.

Mar haddii aad halkaan soo gaartay buugga intiisa horena aad soo akhrisay waxaad u diyaarsantahay in aad fahamtid luuqadda uu suuqu ka hadlo balse haddii aadan buugga intiisa hore soo akhrin waxyaalaha aan halkaan kaga hadlayo way kugu adkaan doontaa in ay macno badan kuu sameeyaan.

Marka aad waddan cusub usoo guurtid si aad dadka halkaas ku nool isku fahamtaan waxaad ku khasbantahay in aad baratid luuqadda ay ku hadlaan. Sidaa si lamid ah haddii aad doonaysid in aad noqotid xirfadle suuqaan ka shaqaysta waxaad ku khasbantahay in aad fahamtid luuqadda uu suuqu ku hadlo. Waxaa jira shaxano badan oo suuqa dhaqdhaqaaqiisa lagu fahmo balse shaxan tusmeedka suuqa aan ku akhrin doono ee aan luuqad ahaanta u baranayno waa Shaxan tusmeedka sida shumaca u samaysan ee loo yaqaan Candlestick charts ee uu sameeyay sarifle caan ahaa


oo u dhashay dalka Japan mgaciisana la oran jiray Homma Munehisa.


Haddii aad fahamtid shumacyada uu suuqu sameeysto sida ay ku samaysmaan, noocyada kala duwan ay u kala baxaan waxaa kuu fududaan doonta in aad baratid luuqada suuqu uu kugula hadlayo taasina waxay sahli doontaa in aad go'aamo saxan qaadatid.

Shumacyada suuqu waxa ay matalayaan sawir dhamaystirana kaa siinayaan xaaladda dhabta ah ee ka socota suuqa balaaran ee adiga oo gurigaaga jooga aad dhankaaga kaga jirtid. Waxay fikrad kaasiinayaan Meesha aad dhiganaysid xariiqihii aan kasoo hadalnay ee Sagxadda iyo saqafka suuqa looga dhigayay, waxay kaloo kuu sheegayaan Meesha la dhiganayo xariiqda kale ee suuqa jihaysa aan iyadana kor kaga soo hadlanay.

Keli iyo koox intaba waad u taxliilin kartaa shumacyada uu suuqu samaysto ha yeeshee waa in aad marka hore iyaga iyo magacayadooda iyo meelaha laga helo aad taqaanid si aad u fahamtid fariimaha kala duwan ay kuu sheegayaan si aad u fahamtid sheekada markasta suuqa ka socota.

*Sidee u samaysmaa Shumac suuqu*




In aad baratid jihooyinka suuqu u socdo waxay ka bilaabataa in aad marka hore fahamtid shumac walba oo ay ishaadu qabanayso markii hore side ayuu ku yimi? Waa in aad garan kartid kor ama hoos Meesha uu asal ahaan kasoo bilowday.

Haddii shumaca Meesha uu ka xirmay ay ka sarayso halkii uu ka furmay waxaad garanaysaa in uu shumacaasi ahaa shumac kor u socday fariinta uu kutusayana ay tahay in suuqaasi uu jihada kore u socdo.Dhanka kale haddii shumaca Meesha uu ka xirmay ay ka hooseyso meeshii uu ka furmay waxay ka dhigantahay in shumacaasi uu ahaa shumac hoos u socday oo kuu sheegaya fariin ah in suuqaasi uu jihadda hoose kusii socdo.

Shumac walba qaybtiisa buuran ee midabka leh waxaa loo yaqaan jirka shumaca, waa qaybta kuu sheegaysa in suuqa ay sariflayaal badani ku jiraan. Haddii aad aragtid shumac buuran oo jirkiisa buuxo waxay muujinaysaa fariin ah in suuqa waqtiga shumacaasi samaysmayo ay ku jiraan sariflayaal badan oo suuqaas ugu jira dhanka shumacaasi u socdo.

Qaybta caatada ah ee shumaca waxaa loo yaqaan hooska shumaca waxayna kuu sheegaysaa in shumaca uu waqtigiisa weli socdo balse aysan suuqa ku jirin sariflayaal lammaanahaas lacageed ugu jira dhankii uu markii hore shumaca u socday. Sidoo kale hooska caatada ah ee dheer waxa uu samaysmaa marka shumac ku bilowday in uu kor u socdo ay ka baxaan sariflayaashii kor u waday oo ay ka xoog bataan sariflayaal kale oo dhanka kale

doonaya in ay suuqa u kaxeeyaan. Shumacyada gaagaaban iyo kuwa dhaadheer farqiga u dhexeeya sidoo kale waxa uu dib ugu laabanayaa sariflayaasha marka uu shumacaasi samaysmayay suuqa ku jiray.

Waxaad arki kartaa laba shumac oo isku jiho u socda balse cabbir ahaan aad u kala dheer! Sababtu waa in shumaca gaaban markii uu samaysmayay ay yarayd xamaasadda suuqa ka jirtay iyo sariflayaasha markaas joogay ee dalabkaas ku jiray, halka shumaca dheer uu la dheeraaday kadib markii ay badnaayeen sariflayaasha suuqa ku jiray waqtiga uu shumacaas dheeri samaysmay.


Hadda kadib inta aadan wax sarif ah galin isku day in aad marka hore si fiican u fiir fiirisid shumacyada u dambeeyay ee suuqu uu samaystay dhanka ay u socdeen, dhererkooda inta uu leegyahay, jirkooda iyo hooskooda midka badan iyo xamaasadda suuqu dhinaca ay u badantahay.

Sidoo kale shumacyadu waxay isku raacaan naqshad ka samaysmata laba shumac iyo wax ka badan, sida ay muhiimka u tahay in aad baratid shumacyada kala duwan iyo magacyadooda si lamid ah ayay muhiim u tahay in aad baratid

naqshadaha kala duwan ee shumacyadu isku raacaan iyo fariintooda.

***Shumac aan lagu kala adkayn (Doji Candlesticks)***

Shumaca noocaan ah waa mid samaysma marka awooda suuqa aysan ku kala adkayn sariflayaasha lacagtaas iska iibinaya iyo kuwa soo iibsanaya, waxa uuna shumacaani samaysmaa xaalad uusan suuqu lahayn jiho cayiman oo muuqata in uu suuqu u socdo .





Shumaca aan lagu kala adkayn waxaad mar walba ku aqoonsan kartaa in ay halkii uu ka furmay iyo halka uu ka xirmayo ay isku hal meel tahay, kor iyo hoosna ay ka xigaan hooskii dheeraa ee samaysmay intii ay is riixriixayeen sariflayaasha suuqa kor iyo hoos u kaxaynayay ee kala adkaan waayay.

Shumaca caynkaan ah badanaa waxa uu samaysmaa marka suuqa jihadiisu isbeddeli doonto ee dhinacii loo waday la doonayo in laga leexiyo. Marka aad aragtid in suuqa uu samaysanayo shumacayda aan lagu kala adkayn fariinta lagaa

doonayo in aad fahamtid ayaa ah in aadan ku degdegin balse aad isbeddel u diyaar garowdid.

Shumaca aan lagu kala adkayn ayaa leh laba nooc oo aan ahayn midka aan kor idinku soo xusay oo iyagu ka samaysma meelaha la dhigto xariiqihii sagxadda iyo saqafka suuqa u ahaa.




Shumaca sidaan u samaysma waxaa ingiriis ahaan loo yaqaan Gravestone doji waana mid kamid ah shumacyada aan lagu kala adkaan. Sida sawirka sare ka muuqata waa shumac isla meeshii uu ka furmay ku xirmay balse samaysta sayn dheer ee kor u jeeda taasi oo kuu sheegaysa in suuqa markii hore kor loo kaxeeyay oo jir buuxa uu yeeshay deedna dib loo soo celiyay oo lagu xiray meeshii uu ka furmay.


sida sawirka midigta ah ka muuqata shumacaan waxaa suuqa laga helaa marka uu suuq kor u




socday uu dhammaado oo la gaaray waqtigii uu jihada beddelan lahaa fariinta la doonayo in aad fahamtayna ay tahay in aad isku diyaarisid in aad

raadisid fursad aad lammaanahaas lacageed iskaga iibinaysid maaddaama uu suuqu hoos aadi doono.

Waxaa jira naqshad saddexaad oo uu u samaysmo shumaca aan lagu kala adkaan, noocaas saddexaad Ayaa Iyana inoo sheegaysa fariin ah in suuqa jihadiisu kala wareegayso, shumacaan ayaa ingiriis ahaan waxaa loo yaqaan Dragonfly Doji




Sida sawirkaan ka muuqata shumacaani isla meeshii uu ka furmay ayuu inta kusoo laabtay ka xirmay taasi oo kuu sheegaysa fariin ah in kooxdii suuqa hoos u waday laga awood roonaaday ayna dhowdahay waqtigii jihada suuqu ay kor isku beddeli lahayd.





Sidaan oo kale badanaa waxay ka dhacdaa meelaha suuqa horay looga celiyay xariiqda sagxada ahayd la dhigto. Xasuusnow mar walba oo suuqa uu cuskado xariiq sagxad kuu ah waxay ka dhigantahay in ay soo dhowdahay fursad suuqaan

kor loo kaxayn doono, waxaana kuusoo dhow fursad aad lacagtaas dalab kor u socda aad ku gali lahayd.

***Shumacyada Isliqa (Engulfing Candles)***

Shumacyada naqshadaan u samaysma waa laba shumac oo isku xigsada midka hore uu yaryahay kan labaadina uu weynyahay oo uu liqi karo kan hore haddii la dhex geliyo.




Naqshad laba shumac ah oo sidaan iskugu xigsada markaad ku aragtid suuq kor u socday halkiisa u saraysa ama suuq hoos u socday halkiisa u hooseysa, waxaa la joogaa waqtigii uu suuqaasi kala wareegi lahaa ee waa in aad ku baraarugtid isbeddelka kugu soo wajahan.








Tababar badan iyo ku celcelin kadib ishaadu way iskala qabsan doontaa in aad shumacyadaan maalin walba suuqa ku dhex aragtid balse inta aad cusubtahay ka raadi meelaha suuqa

horay looga celceliyay ee aad dhigan kartay xariiqihii jiifay ee sagxada iyo saqafka ahaa meelahaas ayuu mar walba suuqu ka kala wareegaa.

***Xiddig subxeed (Morning Star)***

Naqshada shumacyada loo yaqaan xidig subxeedka waxaa samayn kara marka ay isku xigsadaan saddex shumac oo midka koowaa iyo kan saddexaadi ay dhaadheeryihiin dhexdoodana uu ku jiro shumaca labaad oo  jir ahaan iyo dherer ahaanba aad uga yar waxaana badanaa laga helaa suuq hoos u soo socday marka uu kala wareegayo oo uu kor aadayo



shumaca koowaad waa hoos u socday oo iska iibiyayaal badan oo suuqa hoos u waday ay suuqa hogaaminayeen, hayeeshee shumaca ku xigay waxaa muuqda in ay weli suuqa iyagii wateen balse awoodoodii ay soo yaraatay ugu dambayna waxaa ku xigsaday shumac dheer oo muujinaya in xamaasadii suuqa ay la wareegeen iibsadayaal doonaya in ay suuqa kor u kaxeeyaan.





Naqshadaha suuqa kala wareejiya oo idil badanaa waxaa laga helaa meelaha hoos iyo kor ku began la dhigto xariiqaha sagxada

iyo saqafka inoo ahaa, mar walba aad shumac noocaan ah raadinaysid ka fiiri meelaha ugu macquulsan ee sagxad ama saqaf la dhigi karo.

***Xiddigga qorax dhaca (The evening star)***

Shumacyada saddexda ah ee sameeya naqshadaan loo yaqaan xiddigga qoraxa dhaca ah ayaa iyagu kuu sheegaya fariin ah in suuqii kor u socday ee la iibsanayay uu gaaray meel sare oo uu ku khasbanyahay in uu soo kala wareego una jiheysto hoos ayna hogaankiisa la wareegayaan sariflayaasha lacagtaas iska iibinaya.




Shumaca koowaad waa mid buuxa oo kor u socday oo ay sameeyeen sariflayaasha suuqa iibsanayay taasi waxay kuu sheegaysaa in suuqa uu kor usoo socday, ha yeeshee shumaca labaad waxaad ka arkaysa in awoodoodii ay daciiftay balse maaddaama shumaca labaad jirkiisa uu yaryahay weli ma kala cadda in toos suuqa loogala wareegay balse shumaca saddexaad ayaa ku tusaya in jihada suuqa ay gabi ahaanga is rogtay sariflayaashii suuqa iska iibinayayna ay kala wareegeen kuwii iibsanayay, suuqii kor usoo socdayna hoos loo celin doono. Si aad u aragtid xiddiggaan iyo naqshada uu



ka samaysmo ka raadi meelaha saqafka ah ee suuq kor u socday uu kasoo kala wareegi karo.

### ***Dubbe/Burus (The Hammer)***

Shumaca noocaan ah waxa laga dhex helaa suuqa jihadiisu isbeddeli rabto. Waxa la arkaa shumacaan marka ay aad iskugu soo dhawaadaan Meesha uu shumaca ka furmay, Meesha uu ka xirmay iyo meeshii ugu saraysay ee uu shumacu gaaray. Waxaa dhici karta suuq hoos u socday iyo mid kor u socdayba Meesha ay kasoo kala wareegi karaan in shumacaan lagu arko.








Muhiimada ugu weyn ee la doonayo in aad shumacaan ka fahamtid ayaa ah in sababta uu u samaysmay ay tahay in suuqii hoos u socday la wareejinayo kadib markii xamaasadii suuqa lagala wareegay sariflayaashii lacagtaan iska iibinayay, hooska dheer ee uu shumacu samaystay waxa uu muujinayaa in sariflayaasha suuqa kor u kaxayn

lahaayeen ay ku khasbeen in uusan suuqu sagxada dhaafin oo kor loo kaxayn doono.

### *Xiddigga duula (The shooting star)*

Xiddiga duula waa shumac lid ku ah kii kahoreeyay aan kasoo sheekaynayay ee Dubbaha oo kale u samaysnaa. Sidii oo kale ayuu leeyahay jir gaaban iyo sayn dheer, halka uu ka bilowday iyo halka uu ku xirmayna aad bay iskugu dhawyihiin waxa uuna isna inoo sheegaa in suuq kor loo waday lasoo kala wareejin doono oo uu hoos aadi karo.




Sawirakaan midiga xigga sida ka muuqata xiddgta duusha waxay ka samaysmataa halka uu ku dhammaado suuq kor u socday sidoo kale waxay afka ku haysaa oo ay ku tusaysaa in halkaas ay ku beegantahay meel saqaf ah oo suuqa laga celin karo.





Xiddigta duusha iyo shumacii ka horeeyay ee Dubbaha u ekaa waa kuwa badanaa lagu heli karo barta suuqa laga galo, ha yeeshee maaha in iyaga oo

qalalan aad suuqa ku galaysid ee waa in aad lafalgalisid istaraatiijiyad sharciyo wadata.

### ***Shumacyada is-dhalay (The Harami pattern)***

Naqshadaan shumacyada ah waxay ka koobantahay laba shumac oo midka hore uu yahay Hooyadii dhashay kan dambe ee ilmaha ah. Naqshadaani waa kasoo horjeedka naqshadii ahayd Shumacyada is-liqa ee aan kor kusoo sharaxnay, sida kuwaas oo kale ayay leeyihiin laba nooc oo suuqa u kaxeeya kor iyo hoos dhinaca ay joogaan maahee dhinaciisa kale.








sida sawirka bidx ka muuqata marka ay naqshadda shumacyadaani ku samaysmeen meel saqaf ah oo ku began dhammaadka suuq kor u socday waxaad arki karaysaa suuqa oo hoos usoo jeestay.Sawirkaan kale ee midigta xiga isna waxaad ka arkaysaa hooyadii iyo iilmaheedii oo ka muuqda sagxad



hoose ee suuq sii daadanayay deedna kor u jeestay kadib markay naqshadaasi samaysmatay.

### ***Shumacyada Tartamada (The Tweezers)***



Shumacyada tartama waa Naqshadda u dambaysa tobankii naqshadood ee luuqadda suuqa lagu afgarto waxa ayna ka koobanyihiin laba shumac oo isku xigsada, balse aan isku jiho u jeedin lagana helo meelaha suuqu ka kala wareego ee la dhigto xariiqaha sagxada iy saqafka ah.




shumacyadaan tartamaya hadba kor iyo hoos Meesha ay ka samaysmaaan ayay ku xirantahay dhanka ay suuqa u kaxaynayaan. Haddii ay suuq kor u socday korkiisa u sareeya ee saqafka ah ay ka dhashaan suuqa waxay u celinayaan hoos, labada shumac waxaan dambeeya midka hoos u socda.




Dhanka kalena marka ay u socdaana waa lidkeeda oo meesha suuqa u hooseysay ee sagxada ah ayaa laga helaa waxaan dambeeya shumaca kor u socda ee suuqa jihadiisa beddelaya.

Toban shumac oo lagu fahmayo luuqada suuqu ku hadlo ayaa halkaas kuugu dhammaaday, ha yeeshee waxay kaaga baahanyihiin ku celcelin badan iyo in aad mid walba gaarkiisa waqti u siisid ilaa ay ishaadu la qabsanayso.

Waqti walba aad suuqa ku fiirinaysid shumacyada oo idil waad ka dhex arki kartaa balse si aad si fiican ugu tababaratid 1H (hal saac shumacii soconaya) iyo 4H (4saac uu shumacii soconaya) labadaas waqti ayaa ugu habboon marka aad rabtid in aad noqotid sarifle si maalinle ah suuqa uga shaqaysta.

Shumacyada in aad baratid waxa ay kuu sahlaysaa in aad ugu yaraan kala fahamtid xaaladda uu suuqu ku jiro iyo waxyaalaha ka suurtagalka ah ee iyaga keliya marna kuuma noqon karaan nidaam aad ku shaqaysid. Waxaad u baahtantahay istaraatiijiyad iyo qorshe lagula hubiyay oo sharciyo iyo talaabooyin la raaco leh.

Istaraatiijiyad walba oo aad aragtid ma ahan 100% inay kuu balanqaadayso in aadan suuqaan ku khasaarayn, sababtoo ah suuqa iyo shaqadiisa oo dhan ayaaba ah qiyaasid iyo odorosid Meesha ay wax aadi karaan iyada oo laga fiirinayo taxliilin lagu

sameeyay dhaqdhaqaaqii lasoo dhaafay ee uu suuqu sameeyay.

## Iskulaab IstaraatiiJi

Qorshahaan aan u bixinay iskulaab istaratiiji waa nidaam runtii aad u fudud oo qofkii buuggaan intiisa hore soo akhriyay soona fahmay uu iyadana si fudud ku fahmi doono.


Istaraatiijiyada oo idil waxaan ka keenay oo ay ka koobantahay qodobadii aad buugga kusoo baratay oo qaybtood si cayiman layskula raadsanayo waqti cayiman, ku dhawaad 6 kun oo arday ah oo aan baray iyo kumanaan kale oo youtube ka daawadayba way isticmaaleen wayna ku faaideen, waa hubaal haddii aad adigana ku celcelisid waad fahmi doontaa waadna ku faaidi doontaa.

Istaraatiijiyada waxaa asal u ah labada xariiqood ee sagxadda iyo saqafka ah ee aan buugga meelo badan kaga soo hadlay. Waxaa kale oo muhiim ah in aad fahamtid sida uu u dhaqaaqo Suuqa jihaysan iyo labada gees ee hoos iyo kor marka uu socdo in uu jaranjarooyin kala hooseya iyo kuwa kala sareeya uu ku socdo.

Intaa waxaa dheer sharciga isku laabka in aad fahamtid iyo goorta aad ogaanaysid in dalabku uu diyaar yahay ee lajoogo waqtigii aad fulin lahayd sarifka adiga oo ka fiirsanaya meelaha aad ka dhiganaysid tirooyinka faaidada aad rajaynaysid iyo khasaraaha aad ogoshahay.

### *Soo Furo Xariiqaha taagan*

Talaabada u horeysa ee la rabo in aad samaysid si aad qorshaha u fahamtid waa in aad baratid xariiqaha taagan sida loogu soo darado Tradinview-gaaga iyo ujeedka aan ugu baahanahay.




Xariiqaha madoow ee shaashadayda kusoo biiray waxay i tusayaan maalintii lasoo dhaafay intii shumac ee suuqa ka samaysmay. Waxay kale oo ay ii sahlayaan in aan suuqa ka dhex arko meeshii ugu saraysay iyo halkii ugu hooseysay ee maalintii lasoo dhaafay suuqa gaaray.Waxaad kale oo aad

shaashadayda ka aragtaa in waqtiga aan suuqa ku fiirinayo uu yahay 1H, oo mancaheedu yahay in halkii saacba shumac cusub samaysmayo.

***Labada xariiqood sawiro***

Labadaa xariiqood ee jiifa ayaa kugu filan marka aad dhigatid Meesha saxda ah ee loogu talogalay deedna aad ixtiraamtid in suuqu uu xariiqahaaga kuugu soo laabto.




Maalin kasta oo cusub suuqu waxa uu ku siinayaa meeshii ugu saraysay iyo meeshii ugu hooseysay ee uu shalay suuqu gaaray, deedna labadaas meelood ayaad laba xariijimood oo jiifa dhigaysaa.

Marba xaaladda suuqa ayay ku xirantahay balse Jirka shumaca iyo afka dheer ee hooska(wick) ah labadaba kii ku haboon waad dhigi kartaa xariijimahaaga. Muhiimadu waa in ay xariijintaadu taal aaggii ugu saraysay iyo ugu hooseysay ee shalay uu suuqu gaaray.

Halkaas wixii ka dambeeya shaqada inteedii badnayd waad qabatay keliya waxaad sugaysaa in

suuqu uu soo dhaafo mid kamid ah labadii xariijimood ee aad sawiratay.

***Iskulaabka ilaasho***




Marka uu suuqu soo jeexo labadaada xariijimood mid kamid ah waxaa xigi doonta in suuqu uu dib iskug soolaabo isla xariijintii uu jabsaday.

Waxaad sawirkaas kore ka arki kartaa in xariiqdii markii hore saqafka ahayd ay sagxad isku beddeshay, xigmada halkaan ku jirta ayaa ah in suuqu uu sagxadda cuskan doono oo uusan dib u jeexin isla xariijintii uu hadda soo jeexay.

Marka aad hubsatid in shumaca xariijinta kusoo laabtay uu sagxada ku dul nastay ee uusan gudbin, markaas ayaad xaqiijisay in aad haysatid fursad aad suuqa kor u raaci kartid.

### ***Xaqiijimo kale oo dheeriya***

Qodobada aan kor kusoo xusay haddii aad suuqa ka heshid way kugu filnaan kartaa in aad fursadahaaga ka faaidaysatid, ha yeeshee waxaa jiri kara xaalada khaas ah oo ay tahay in aad raadisid xaqiijimo dheeriya oo aad taxliilintaada ku kabtid.

iska hubin in suuqu uu ku socdo jaranjar la arki karo, taasi oo si cad kuu tuusaysa in suuqu uu samaysanayo kor ama hoos ka cusub middii ka horeysay.




Marka aad arki waydid in suuq kor ku socday uusan kor cusub samaysan waxay ka dhigantahay in jihadiisu isbeddeli doonto. Sidoo kale suuq kasta oo hoos u socda haddii uusan hoos cusub samaysan waxaa laga yaabaa in uu suuqu kor usoo

laaban doono balse markasta oo uu hoos ama kor cusub samaysto waa karaar qaadasho hor leh.



Xamaasadda suuqu in ay wareegtay oo aad la socon kartid ayaa Iyana kuu ah xaqiijin kale oo aad iskaga hubin kartid ka hor inta aadan suuqa iska galin.

Sida sawirka ka muuqata waxaad marmarka qaar arki doontaa suuqa hoos u dhacayay oo mar walba hoos cusub uu ku siiyo aad si fiican hoos ugu sii raacaysay, balse markii dambe ayuu iskulaabyadii mid kamid ah kasoo laaban waayay oo kor iskaga sii socday, markaas oo kale waxaa wareegtay xamaasadii suuqa waxaana la rabaa in aad ka fiirsatid fursadaha aad gaadaysay in ay xaalad noocaas ah ku jiraan ka hor inta aadan galin.

Xariiqda jiheeyaha suuqa ah ee aan sawirka kore kugu tusayo keliya aniga halkaan ayaan u isticmaala, shaqadeedu waa inaan ku eegto in jihadii iyo laxankii islahaa ee uu suuqu ku soconayay ay khaldameen, marka aan arko in

xariiqdayda jiheeyaha ahayd aysan labada madax ee u dambeeyay suuqa taabanayn waxaan fahmayaa in suuqa xamaasadiisii wareegtay.




Sawirkaan kore waxa uu tusaale u yahay waxyaalaha aad khaldi kartid ee ay tahay in aad ka taxadartid. Sawirka waxaa ka muuqda in suuqa uusan ixtiraamin sagxadii markay saqaf isku bedeshay balse uu shumacii iskulaabka ahaa kasoo dhex baxay halkii la rabay in uu ixtiraamo.

Sidoo kale dhanka bidix ee suuqa waxaa ka muuqda in jihada uu suuqu kusoo socday ay kor ahayd balse sida muuqata xamasaasadii suuqa ay wareegtay maadaama kor dambe oo cusub aysan muuqan ee uu hoostii hore kasoo hoos maray, hase ahaatee iyadoo ay sidaa tahay ayaa lagaa rabaa in

aadan suuqaan oo kale ku degdegin inta jihadiisu toos u cadaanayso ee uu ka samaysanayo jaranjar kala hooseysa oo la akri karo.

Ugu dambayn waxaad mar walba isku ilaalin kartaa in aad ku baraarugsanaatid shumacyada iyo naqshadahoodii aad soo baratay marka aad kula kulantid meel kor kuu ahayd oo la jeexay deedna laysku soolaabay.




Sida sawirkaan ka muuqata waxaad arkaysaa suuqa oo jeexday xariiqdii saqafka ahayd oo uu samaystay kor cusub deedna uu xariiqdii isku soolaabaay, halkaas ay xariiqdu sagxadda ka noqotayna ay celisay suuqa. Barta suuqa laga celiyay ayaa waxaa ka samaysmay mid kamid ah shaxanadii aan soo baranay ee ay shumacyadu samaynayeen. Waxan haysanaa shumacyada kor isku liqa ee suuqa xagga sare u kaxeeya taasi oo kuusii xaqiijinaysa fursad weyn oo aad suuqaan kor ugu raaci kartay.

Markaas oo kale ayay ku anfacayaan shaxanadii iyo noocyadii kala duwanaa ee shumacyadu u kala baxayeen ee aad soo baratay waana sababta aan mar walba u muujinayay saqafka iyo sagxadda.

***Bidix fiiri***

Sirta ugu weyn ee suuqa oo idil waa in aad mar walba fiirin kartid dhanka bidix ee shaashada. Inta aadan taxliilin bilaabin bidix fiiri, inta aadan xariiqaha dhigin bidix fiiri, inta aadan iskulaabka fiirin dhanka bidix fiiri.

Shumacyada suuqu uu samaysanayo waxay ku socdaan shaxan isleeg ah, wax walba oo uu horay suuqu u soo sameeyay wax u eeg ayuu mar kasta gadaal ka samaynayaa, si aad ugu baraarugtid waxyaalaha soo socda isku day in aad si fiican u taxliilisid dhanka bidix ee suuqa sababtoo ah halkaas ayay kaa xigtaa xogta kaydsan ee lasoo dhaafay.



Dhanka bidix fiiri ka hor inta aadan qorshaysan Meesha aad dhiganasyid tirooyinka mobilka lagalinayo ee kusiinaya Faaidada suuqa laga filayo iy khasaraha aad ogoshahay. Sida sawirka ka

muuqata khasaraha la filayo ka dhigo meel ka hooseysa meesha kuugu soo dhow ee suuqa laga celceliyay si aad uga digtoonaatid in dalab saxnaa qorsho xumo kaag xirmo.

## Xakamaynta khasaarada

Suuqa sarifka lacagaha qalaad waa Meesha dhaqaalaha ugu badan dunida laga sameeyo, xataa waxay ka badantahay suuqa saamiyada haddana sidaa oo ay tahay 5% dad ka yar ayaa suuqaan xirfad ahaan uga shaqaysta!

Xog uruurin ayaa waxaa lagu ogaaday dadka suuqaan bilaabay 90% lix bilood kabadan kuma sii jiraan, sababta ugu weyn ee keenaysa Meesha dhaqaalaha intaa le'eg laga sameeyo in aysan bulshaddii ka shaqayn waa in ay jirto suurtogalnimo khasaareed oo barbar socota dhaldhalaalka iyo mustaqbalka quruxda badan ee laga filayo.

Dadka badanaa suuqaan ka niyad jaba waxaa sabab u ah iyaga oo aan mawduucaan fahmin ama dhayalsaday sidii wax aan muhiim ahayn. In aad qodobkaan fahamtid ayaa ka muhiimsan dhammaan wixii aan kasoo hadlaynay.

Xakamaynta khasaarada kusoo koobi mayno sarif hal mar ah oo aad gashay iyo lacagta aad halkii dalab dhigatay ee waxaynu u qaybinaynaa afar qodob oo mid walba uu muhiim gaar ah leeyahay.

***Lacagta aad ku bilaabaysid***

lacagta aad suuqa lasoo galaysid waa halka ugu horeysa ee ay tahay in aad su'aal iska weydiisad ka hor inta aadan khasaaro xakamayn kaba hadlin.

Iska ilaali lacag aadan adiga lahayn in aad suuqa lasoo gashid, waxaan arkay dad badan oo lacag qosyku leeyahay oo uusan isagu mulikayadeeda lahayn suuqa lasoo galay deedna qayb yar oo lacagtaas kamid ah marka uu khasaaro intii badnayd ee u hartay uma muuqato ee isagoo isleh qaybta luntay soo celi ayuu intii kalena sii luminayaa.

Lacag dayn ah oo hadhoow lagaa sugayo suuqa hala soo galin. Dadka lacag dayn ah oo aysan lahayn suuqa lasoo gala marna si xorriyad iyo kalsooni ah uma shaqyasan karo, waxa uu ogyahay in haddii uu khalad yar gaysto ay u dhammaatay taas ayaana ka hor istaagi karta fursado badan oo ku dhiirrasho u baahnaan lahaa.

Marna suuqaan halasoo galin Lacagta biilka xaafada, kirada guriga, iyo lacagta jaamacada ku bixin lahayd, qofka duruufaha caynkaan oo kale ah suuqa lasoo gala isaga ayaa ka khasaaro badan kuwa lacagtu ka badbadatay ee aan khasaarahaba dhibka u arkin.

Bini aadamku caadiyan waxa uu u bartay in la xakameeyo, ilaa markii aan yarayn waalidkeen iyo macalimiinteena ayaa sax iyo khalad inoo kala sheegi jiray, markaad shaqo bilowday madax kaa saraysa ayaad uga baratay in ay mar walba doorkaaga kuu yeeriyaan, markaan soo weynaanay sharciyada iyo qawaaniinta bulshda ayaa inoo diidayay in aan waxaan rabno samayn karno.

Qof noloshiisa oo dhan u bartay wax walba uu samaynayo in awaamir ka sareysa la raaco ayaa la yiri xor baa tahay, suuq xor ah oo lacagtii aduunka laga sameeyana dhankaaga ka gal! qofkaas suuqii oo dhan wuxuu la noqonayaa ciyaar gacmeedka mobilka lagu ciyaaro ilaa uu gaaro heer aysan khasaaradu xanuunba ku hayn.

Haddii aad rabtid in aad suuqaan mustaqbal ku yeelatid marka hore suuqa xirfad ahaan u baro, iska iloow xataa in lacag laga samaynayay, la saaxiib kambiyuutarka isku day in aad saacado

shumacyadii lasoo dhaafay kor iyo hoos u xiisaabisid, baro talaabo walba uu suuqu soo qaaday sanadihii lasoo dhaafay. Suuqaan marka hore waa xirfad ee ma ahan ganacsi iska gal ah deedna aad maalmo gudahood taajir ku noqonaysid.

Xirfad walba oo la barto waxay u baahantahay tababar iyo waqti la galiyo.

Ciyaartooyda banooniga ciyaarta malaayiin doolar ayay qaataan in ay kumanaan qof hortood kubad ku cayaaraan malaayiin kalena ay shaashadaha ka daawadaan. Ogoow dadkaa ciyaaraya ee lacagta intaa le'eg qaadanaya ilaa markii ay toban jir ahaayen ayaa ay maalin walba tababar iyo dadaal aan cidna ogayn ay ku jireen.

Halkaas oo kale iska fiiri maanta adiga oo keligaa ah mobilkaaga iyo kambiyuutarkaaga isku keliyaysta, maalin waxaa imaan doonta dadaalkaas daaha hoostiisa ah ee aysan cidina kula ogayn aad abaal marintiisa meel la buuxo ku heli doontid.

Marka aad xirfadda baratid ee ay gacantaadu fariisato isku day lacagta aad heli kartid ee aad adiga leedahay intii ay doontaba ha ahaatee in aad suuqa lasoo gashid. Haddii aad shaqayso mushahaarkaaga wixii kaaga dhigmi kara bil walba

qayb reebo, haddii aadan shaqayn waalidka iyo walaalaha kaa waaweyn ee shaqeeya waydiiso in wixii ay awoodaan kugu saacidaan.

Haddii aad waxkale waydidi alaab kuu tiilay dib u iibi, baaskiilkaaga, mobil dheeriya haddaa haysatay, ilaa dharkaaga hadday kula gasho qayb dib u iibi balse marna suuqaan halasoo galin lacag aadan adigu lahayn, lacag dayn ah oo lagaa sugayo iyo lacag baahi kale oo muhiim ah lagu fulin lahaa intaasba iska ilaali.

### ***Khasaaro tafaariiqeed***

Marka laga yimaado khasaaraha kaaga imaan lahaa lacag aadan lahayn oo aad suuqa la gashid, qodobka labaad ee ugu weyn ee khasaaro keeni kara waa lacagta yar ee aad halkii sarifba aad la galaysid ee kamidka ah lacagta guud ee kuugu jirta koontadaada.

Buugga qaybtiisa hore ayaan si kooban ugaga soo hadlay lacagta aad suuqa markiiba ku khasaari kartid waxaa ingiriis ahaan loo yaqaan lot size. Dadka badanaa waxaa iskaga khaldama lot size-ka iyo lacagta caadiga ah ee uu suuqa lasoo galayo.

Lot size-ka saddex heer oo kala duwan ayaa loo kala saaraa Micro, Mini iyo Standard. Lacagta kuugu jirta ayayna ku xirantahay lot size-ka aad

qaadan kartid Micro waa lot size aad u yar oo ka bilowda 0.01 ilaa 0.09 kadib Mini ayaa ku xiga oo kaas ka weyn waxa uu ka bilowdaa 0.10 ilaa 0.90 intaa wixii ka dambeeya ayaa waxaa loo yaqaan standard wuxuu ka bilowdaa 1.00 ilaa kor wixii ka jira.

Shaxanakaan hoose ayay kuugu taxantahay saddexda nooc ee lot size-ka ahba, kii aad suuqa la gashid iyo inta aad faaido ama khasaaro aad kal kulmi kartid markasta oo suuqu kor ama hoos u dhaqaaqo

| Micro lot size | 1 pip Lacag ahaan | 20 pip | 40 pips | 60 pips |
|---|---|---|---|---|
| 0.01 | $0.10 sent | $2 | $4 | $6 |
| 0.02 | $0.20 sent | $4 | $8 | $12 |
| 0.03 | $0.30 sent | $6 | $12 | $18 |
| 0.04 | $0.40 sent | $8 | $16 | $24 |
| 0.05 | $0.50 sent | $10 | $20 | $30 |
| 0.09 | $0.90 sent | $18 | $36 | $54 |
| Mini Lot size | | | | |
| 0.10 | $1 | $20 | $40 | $60 |
| 0.20 | $2 | $40 | $80 | $120 |
| 0.30 | $3 | $60 | $120 | $180 |
| 0.40 | $4 | $80 | $160 | $240 |
| 0.50 | $5 | $100 | $200 | $300 |
| 0.90 | $9 | $180 | $360 | $540 |
| Standard lot size | | | | |
| 1.00 | $10 | $200 | $400 | $600 |
| 2.00 | $20 | $400 | $800 | $1,200 |
| 3.00 | $30 | $600 | $1,200 | $1,800 |
| 4.00 | $40 | $800 | $1,600 | $2,400 |
| 5.00 | $50 | $1000 | $2000 | $3000 |
| 9.00 | $90 | $1,800 | $3,600 | $5,400 |

Si aadan niyad jab iyo khal khal ula kulmin isku day $100 iyo wax ka yar haddii aad haysatid 0.01 ka badan suuqa in aadan ku galin. Intii aad lot size weyn ku khamaari lahayd isku day in aad pips badan suuqa ka qabatid. 1000 pip haddii aad bil walba qabatid lacagtaada way laba jibaarmaysaa.

***Intee Sarif ayaad isku mar furi kartaa***

Waxyaalaha kale ee khasaaraha keena waxaa kamid ah in qofku uusanba ku xisaabtamin in sarifyadii u furnaa ay qaybtood khasaaro ku jiraan deedna uu dalabyo cusub galayo. Mar walba aad dalab cusub galaysid xisaabi inta hadda kuu furan iyo midka aad furi rabtid kuligood haddii ay khasaaro ku dhammaadaan koontadaydu ma xamili kartaa.

Si kasta oo aad u cilmi badantahay maalmaha qaybtood iyo asbuucayada qaybtood adiga oo wax walba kuu saxanyihiin ayaa dhacdooyinka aduunka ka jira suuqa dhinaca kale u kaxayn karaan. Isku day in aad ogtahay in Fursadahaagii saxnaa ay khasaaro ku dhammaan karan, haddiiba suurtogalnimadaasi jirto waxaa haboon in aad marka hore kusii xisaabtantid khasaaro aad xamili kartid ileen faaido doon ayaa tahaye.

Dad badan ayaa waxay ku oran doonaan 0.01 ayaan isitcmaalayaaye maxaa dhib ah oo ku jira, haddii aad 20 jeer 0.01 ku gashid dhibka ku jira ayaa ah in 10 kamid ah ay khasaaro degdeg ah kugu keeni karaan deedna suuqa dhan aad ka niyad jabi kartaa oo aad kuwii kalena khasaaro ku xiri kartaa, halkii ay ahayd in aadan markiiba galin wax ka badan3 ilaa 5 sarif oo xisaabsan.

***Khasaaro intee leeg ayaa caadi ah***

25% haddii ay khasaaradaadu ka badato waxaad u baahantahay in aad qorshahaaga wax ka beddeshid, waa in aad aqoontaada iyo heerka xirfadaadu gaarsiisantahay aad dib ugu laabatid.

Lacagtii aad koontadaada ku bilaabatay khaladaad farsamo xumo ah aad gaysatay haddii ay kaaga wada khasaarto waa wax la fahmi karo, balse haddii sarif iyo fursado aad gashay ay kuli lacagtaadii kaaga khasaarto markaas waa inaad wajigii koowaad ee waxbarashada ku laabatid.

Ceeb maaha in aad marka hore iyo marka labaad khasaartid sababtoo ah dadka oo dhan ayaa suuqaan kusoo wada khasaaray markii ay cusbaayeen balse dadka intii niyad jabtay maahee inta weli joogta ee malaayiinta ka samaynaya

waxaysan weligood soo dhaafin wajiga hore ee ardaynimada ah.

Istaraatiijiyadaadu haddii aysan kusiinayn wax ka badan 75% faaido ah waxaa la joogaa waqtigii aad mid kale oo cusub raadin lahayd sababtoo ah intaa wixii ka dambeeya suuqa ayaa xun iyo qof baa si khaldan wax iigu sheegay marmarsiiyo joogto ah ma noqon karaan.

## Waa maxay Sababtaadu?

Dadka badanaa suuqa soo gala marka hore tijaabo iyo soo fiiri ayay kusoo galeen balse si aad suuqaan ugasii mid ahaatid lacag kugu filan kaana badan aad uga samaysid waa muhiim in aad qoratid sababo kugu khasbaya in aad xirfadaan ku guulaysatid.

In aad horay suuqa uga baxdid way sahalanaan kartaa Haddii aysan kuu qornayn hadafyo cayiman oo kugu kalifaya in aad maalin walba aroor hore hurdada kasoo toostid si aad suuqii u taxliilsid fursadna uga dhex raadisid.

Laga yaabaa in ay sababtaadu tahay in aad heshid xorriyad waqti, maalin oo dhan aad shaqaynaysid habeenkiin adiga oo niyadda iyo jirkaba ka daalan aad guriga timaadid, qoyskaag iyo asxaabtaada aadan waqti ku filan u helin.

Laga yaabaa in hadafkaagu yahay in aad waalidkaa shaqada ka fariisisid si ay cimrigooda inta u hartay nasasho iy cibaado ugu qaataan, laga yaabaa in ayba kaa xanuunsanyihiin adigana ay ku fiirsanayaan. Laga yaabaa in sababtaadu tahay in aad dunida ku dalxiistid nolol qurux badan oo xoriyad ahna aad ku noolaatid. Waxay ahaataba imminka qor sababaha suuqaan kugu hayn kara iyagoo faahfaahsan oo far waaweyn ku qoran.

Marka ay kuu cadaato sababta aad u samaynaysid wax kasta aad samaynaysid kadib uma baahan doontid in dhiirrigelin banaanka ah aad sugtid, subax walba sababtaada ayaa hurdada kaa kicin doonta.

## Qorshe Ganacsi

Mar haddii aad qeexday hadafkaaga aad suuqaan ugu jirtid, xirfadii iyo cilmigiina aad soo bartay, koontadii aad ku shaqaysanlahaydna aad lacag kusoo shubatay, halkaan marka aad soo gaartay ayuu suuqu sarifku kuu noqon karaa shaqo iyo ganacsi aad keligii ku xamaalan karto.

Qorshahaaga gacansigu waa in uu ka koobnaado Istaraatiijiyadaada oo qeexan sharciyadeedana wadata. Waa in ay ku caddahay hadafkaaga lacageed ee aad doonaysid in aad asbuuc walba

suuqa ka qaban kartid. Qorshahaaga waa in ay ku caddahay waqtiyada aad maalin walba suuqa u qorshaysay wax kasta oo yimaadana aad waqtigiisa u hurtid. Qorshahaaga ganacsiga waa in ay ku qeexantahay nidaamkaaga xakamaynta khasaaraha.

Ha ilaawin in qorshahaaga aad ku darsatid waxyaalaha ay tahay in aad aqoon ahaan iyo maskaxiyan ahaan aad naftaada uga horumarin lahayd. Sababtoo ah suuqaan waxaa xamili kara qofkii maskaxiyan u diyaarsan ee fahamsan in sheekadaani ay bil iyo sanad ka badantahay. Waxaa imaan doonta in dadka oo dhan ay kaasoo horjeestaan, waxaa imaan doonta qaybtood in ay ciyaar iyo qosol kaa dhigtaan, waxyaalahaas oo dhan waxaa xamili kara qofkii og in uu dagaal maskaxeed lagula jiro.

Safarkaan aad keligaa hayaanka u tahay sahaydiisa ugu weyn aad heli kartid waa Samir iyo dulqaad, qof walb oo isagu niyad jabsan wuxuu isku dayi doonaa inuu adigana ku niyad jabiyo, qofkasta oo faashil ah wuxuu isku dayi doonaa inuu adigana kusoo fashiliyo sababtoo ah niyadjabayaasha iyo kuwa fashilmay ma rabaan in ay keligood xaaladaa ku noolaadaan waxay rabaan in dadka oo dhan la mid ahaadaan oo niyad jabka iyo fashilka lagu wada

qaxweeyo oo qosol beenaad aan guaha jirin waqtiga laysku dhaafiyo.

Dagaal maskaxeedkaas waxaad uga guulaysan kartaa in aad hadafkaaga u taqaanid sida aad cirka iyo dhulka u kala taqaanid. Wax walba oo kale ee soo haray hadafkaaga ka hormari, ogowna albaabka guusha adiga oo aan horta galin qof kale masoo galin kartid, marka hore naftaada ayaa hawl joogto ah kaa rabtee iska jir in aad qof kale ku mashquushid.

Xirfadda suuqa in la barto waa wax aad u fudud balse Meesha la rabo in aad waqti badan galisid waa sidii aad maskaxdaada iyo hab fikirkaaga u dhisi lahayd. Xataa haddii aad lacag samaysid oo aadan maskaxiyan u diyaarsanayn lacagtaasi meel ay martay arki maysid.

……..